# BUUG YARAHA BUKAANKA










stelizabeth.com

St. Elizabeth
HEALTHCARE

# JADWALKA TUSMADDA


**SOO DHAWOW** .......... 3

**HIMILADA IYO HIIGSIYADA** .......... 4

**XUQUUQAHA BUKAANKA IYO MASUULIYADAHA** .......... 5

- Bukaanka helaya adeegyada St. Elizabeth Healthcare waxay xaq u leeyihiin: .......... 5
- Bukaanka ka helaya adeegyada St. Elizabeth Healthcare waxay leeyihiin masuuliyada: .......... 6
- Ogaysiiska Gaar ahaanshaha .......... 6

**TAKOOR LA'AANTA IYO SHURUUDAHA HELIDA** .......... 7

**JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO** .......... 9

- Waayo aragnimadaada xaga St. Elizabeth .......... 9
- Ballan qaadka Adeegga Macmiilka .......... 9
- Waxyaabahaaga qiimaha leh/Sheeyada gaarka ah .......... 9
- Bukaanada Booqanaya .......... 9
- Saacadaha Booqashada ee Gaarka ah .......... 10
- Qolalka Booqdaha .......... 10
- Ogaysiiska Dhaqanka .......... 10
- Baabuur dhigashada .......... 11
- Cuntooyinkaaga .......... 11
- Telefeeshan .......... 11
- Telefoonada .......... 11
- Shuraakada ku jirta Daryeelka .......... 12
- MyChart Sariirta dhinaceeda .......... 12
- CareGram .......... 12
- Internatka Bilaashka ah ee Aan waayirka lahayn .......... 13
- Waxyaabaha Caawimada leh ee La ogaanayo Marka aad Joogto Cusbitaalka .......... 13

**BADBAADO KUGU ILAALINAYA** .......... 14

- Ka hortagga Caabuqyada .......... 14
- Badbaadada Bukaanka .......... 14
- Kaalmada Qaadista iyo Dhaqaajinta .......... 14
- Badbaadada, Tayada ama Walaacyada Adeega ee macmiilka .......... 15
- Bukaanada Ka baxaya Qaybta Asbaabo Aan Caafimaad ahayn Awgeed .......... 16
- Ma jiro Sigaar Qiijin ama Xeerka Isticmaalka Buuriga .......... 16
- Amniga .......... 16

**ADEEGYADA KALE** .......... 17

- Kaafateeriyada iyo Adeegyada Iibka .......... 17
- Dukaanada Hadiyada .......... 17

**BUUXINTA BAAHIYAHAAGA** .......... 18

- Maaraynta Xanuunka .......... 18
- Ballankayaga adigu waa .......... 19
- Ka reebidayada bukaanada .......... 19
- Su'aalaha si loo waydiiyo kalkaalisada ama dhakhtarka .......... 19

**ADEEGYADA TAAGEERADA** .......... 20

- Qaabka Taageerada Diimeed .......... 20
- Mutadawiciinta .......... 20
- PrimeWise - Ku xidhaysa Dadka waa wayn ee 50+ Caafimaadka Iyo Fayo qabka .......... 20
- Maaraynta Cudurka sonkorta .......... 20
- Xarunta Kalkaaliska Xirfada leh .......... 20
- Daryeelka Caafimaadka guriga .......... 20
- Adeegyada Farmasiiga .......... 21
- Barnaamijka Dirida Dwada Cusbitaal ka bixida .......... 21
- Adeegyada Deegaanka .......... 21
- Daryeelka Dadka aadka u ildaran .......... 21
- Guriga Daryeelka dadka Il daran .......... 21

**DHIBAATOOYINKA CAAFIMAAD, SHARCI IYO DIIMEED** .......... 22

- Dardaaranka Qofka Nool iyo Wakiilashada Qofka kele ee Raagta .......... 22
- Taageerada iyo Daryeelka Dhammaadka Nolosha .......... 22
- Xubin Ku deeqida Jidhka .......... 23
- Erayada Daryeelka caafimamadka iyo Erayada La soo gaabiyo .......... 24

**MACLUUMAADKA MAALIYADA** .......... 25

- Oggolaanshaha/Ka hor Oggolaanshaha .......... 25
- Kharashyada Adeegyada .......... 25
- Biil bixinta iyo La talinta Maaliyada .......... 25
- Caymiska Daryeelka Caafimaadka .......... 26
- Abaal marinta .......... 26
- Mu'asasada/Tabarucaadka .......... 26
- Bogsiiyayaasha Dhexdayada Barnaamijka Bukaanka .......... 26

**HORE U SII QORSHAYNTA** .......... 27

- Iskuduwidda Daryeelka .......... 27
- Qorshaynta ka bixida Cusbitaalka .......... 27
- Ka saarida St. Elizabeth Healthcare .......... 27
- Shaacinta macluumaadka ka soo baxay Diiwaanada Caafimaadka .......... 27
- Xog ururinta Bukaanka .......... 27

## Ku soo dhowow St. Elizabeth Healthcare



Janaayo 21, 1861, St. Elizabeth waxay ka fureen albaabadeeda Seventh Street gudaha Covington iyaddoo wadata 10 sariirood oo bukaanka ah. Maanta, St. Elizabeth Healthcare waa adeeg bixiyaha daryeelka caafimaadka goboleed oo leh shan xarumood iyo in ka badan 8.700 oo shaqaale ah oo u adeegaya dadka degen shan Degmooyinka Waqooyinka Kentucky ah; Degmadda Dearborn, Indiana, iyo Cincinnati, Ohio. Ilaa bilowgayagii, waxaanu raadinay inaanu bixino daryeel naxariis leh oo dhammaystiran oo horumariya caafimaadka dadka aanu u adeegno. Marka aad timaado St. Elizabeth Healthcare, waxaad qayb ka noqotay dhaqanka dheer.

Sababtoo ah waxaanu ku ballan qaadaynaa wanaag, waxaanu ognahay in daryeelka wanaag-san uu ku lug leeyahay wax ka badan dawo wanaagsan. Taasina waa sababta walaacayaga aanu kaa qabnaa u kordhaysa qayb kasta oo joogidaada ah. Waa hadafkayaga muhiimka ah inaan ku siino daryeel tayo leh oo aanu ka dhigno waayo aragnimadaada cusbitaalka mid badbaado iyo raaxo badan sida suuragalka ah.

Macluumaadka buug yarahan waxay caadi ka dhigi doonaa adeegyadaada cusbitaalka iyo xeerarka oo waxay ka jawaabi doonaan su'aalo badan oo aad qabto muddada joogidaada St. Elizabeth Healthcare. Haddii aad qabto su'aalo aan lagu soo qaadin buug yarahan, fadlan haka baqan inaad codsato caawimada xubin kasta oo kooxdaada caafimaadka ah.

Anagoo metelayna shaqaalahayaga, shaqaalaha caafimaadka iyo guddida maamulka, waxaan kuu kordhinayaa soo dhawayn gaar ah, oo waad ku mahad san tahay doorashada St. Elizabeth Healthcare baahiyaha caafimaadka hadda.

Kii daaca kuu ahaa,



**Garren Colvin**
Madax waynaha Sarkaalka Madaxa Hawl fulinta

# HIMILADA IYO HIIGSIYADA

## HIIGSIGA YAGA

Xaga goobta caafimaadka Kaatoliga, waxaanu bixinaa daryeelka dhammayska tiran oo naxariista leh ee horumariya caafimaadka dadka aanu u adeegno.

## HIMILADAYADA

St. Elizabeth waxay u hogaamin doontaa bulshooyinka aanu u adeegno si ay u noqdaan kuwa ka caafimaad badan gudaha wadanka.

## QIYAMKAYAGA *(I CARE)*

**I**

**CASIRAYAYNTA**
Waxaan raadinayaa qaabab wanaagsan oo aan ku Qabto shaqadayda, uga helo xalal hal abuur leh oo aan u qaato beddelka.

**C**

**WADA SHAQAYNTA**
Waxaan fahmayaa tixgelinta labbada dhinac ah iyo shaqada kooxdu inay muhiim u tahay dhammaystirka hadafyada. Waxaan la shaqeeyaa kuwa kale si ay u gaadhaan shakhsiga ugu wanaagsan iyo natiijooyinka ugu badan.

**A**

**LA XISAABTANKA**
Waxaa u istimaalaa ilaha, si waxtarleh, Ujawaab kuwa kale si degdeg ah, wajaha caqabadaha wakhti habboon, oo aqbalaya masuuliyada tallaabooyinkayaga iyo go'aamada.

**R**

**TIXGELINTA**
Waxaan tixgelinayaa sharafta iyo kala duwanaanshaha shaqaalahayaga, dhakhtarada, bukaanada iyo xubnaha bulshadda. Waxaan sare u qaadataa kalmsoonida, xaq ahaanta iyo ka wada qayb galka dhexda daacad iyo wada xidhiidh furan.

**E**

**WANAAGA**
Waxaan rumaysanay u adeega raadinta wanaagsa daryeelka caafimaadka. Si naxariis leh u daryeel niyada, jidhka iyo ruuxda bukaan kasta.

**Tilmaamaha Anshaxa & Diimeed**
Sidii nidaamka caafimaadka kaatoliga, St. Elizabeth Healthcare si adag waxay u raacdaa Tilmaamaha Anshaxa & Diimeed ee Kaatoliga Adeegyada Daryeelka caafimaadka.

**Macluumaadka dheeraada ah, fadlan arag tilmaamaha ay daabacday Shirka Maraykanka ee Biishobyada Kaatooliga.**
www.usccb.org/issues-and-action/human-life-and-dignity/health-care/

# XUQUUQDA BUKAANKA IYO MASUULIYADAHA

## BUKAANKA KA HELAYA ADEEGYADA XAGA ELIZABETH HEALTHCARE WAXAY XAQ U LEEDAHAY:

1. Inay helaan taageerada iyo ilaalinta xuquuqaha aadamaha aasaasiga ah, madaniga ah iyo sharciga ah.
2. Inay helaan gaadhida aan eex ahayn oo daryeelka ah, iyaddoon loo eegin isirka, caqiidada, asalka qaranka, diinta, sinjiga (ay ku jirto uurka, xaaladaha caafimaadka la xidhiidha, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, iyo fikradaha laga qabto sinjiga), qoomiyada, da'da. curyaanimada, luqadda iyo heerka dhaqan dhaqaale bulsho.
3. Ka helo tixgelin sharafta nolosha ee fikrada dhimashada dabiiciga ah.
4. Inuu helo adeegyada daryeelka caafimaadka xishmad iyo tixgelin leh gudaha awoodaha, iyaddoon loo eegin kartida lagu bixiyo lacagta.
5. Adeegyada diinta iyo ruuxda iyo in lagu dhaqmo caqiidooyinka dhaqan iyo ruuxeed haddi aanay waxyeelayn kuwa kale ama aanay faro gelinta daryeelka caafimaadka ama fayo qabka kuwa kale.
6. Ka qayb qaata dhammaan qaybaha daryeelkooda, ay ku jiraan hakinta adeegyada neef ku soo celinta iyo iska dhaafida ama ka noqoshada daawaynta nolol sii waarinta.
7. Ka hela macluumaadka dhakhtarada waxa ku saabsan sifada, ujeedada, natiijooyinka la filayo, khataraha muuqda iyo beddeladaadaha la aqbali karo ee nidaamyada cudur baadhida iyo daawaynta.
8. Hela macluumaad ku saabsan sifada natiijada aan la filayan, haddii ay midi dhacdo.
9. Siiya oggolaanshaha la wargeliyay oo ka qayb gala go'aamada ku saabsan daryeelka, daawaynta, iyo adeegyada ay ku jiraan xaqa in degdega dhakhtarkeeda ama kiisa loogu wargeliyo dhigtaanka cubsitaalka.
10. Inaad diido daawaynta ilaa heerka sharcigu ogol yahay iyo in si lagaaga waramo waxa ku saabsan cawaaqibka talaabadaas.
11. Lagu wargeliyo beddelada daryeelka dhabta ah marka daryeelka xaruntu in dheeraad ah aanay habboonayn.
12. Hela joogtaynta macquulka ah ee daryeelka.
13. Haysta qofka xidhiidhka degdega ah iyo dhakhtarka daawaynaya bukaanka oo degdeg loogu wargeliyo in la dhigo xaga St. Elizabeth Healthcare.
14. Inay ka qaybgalaan qoyska bukaanka ama qofka taageerayda daryeelka, daawaynta iyo go'aanada adeegyada ilaa xadka uu oggolaado bukaanka ama wakiilka go'aanka gaadhaya, si waafaqsan sharciga iyo xeerka.
15. Si waafaqsan sharciyada lagu dabaqo, magacow wakiil go'aanka gaadha si loo sameeyo doorashooyinka caafimaadka ee bukaanka xaalada bukaanka ka dib uu noqdo mid aan awoodin fahanka daawaynta la soo jeediyay ama nidaamka ama haddii kale waxa uu noqon karaa mid aan awoodin inuu ka hadlo rabitaanada ku saabsan daryeelkooda. Wakiilka go'aanka gaadhayaa waxaa la siin doonaa macluumaadka ku saabsan natiijooyinka daryeelka, daawaynta iyo adeegyada natiijooyinka aan la filayn.
16. Ay u iman karaan booqdayaashu, boostadda, iyo telefoonka.. Haddii ay jirto baahida xayiradaada wada xidhiidhka,bukaanku waxa uu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo sababta, inay ka qayb qaataan go'aanka oo xayiraada loo qiimeeyo waxtarka daawaynta.
17. Ilaaliyo deegaanka halka dedaalada macquulka ah iyo ku habboon loo sameeyo ilaalinta sirta gaarka ah, inay ilaaliyaan sharafta oo qaybiyaan sawirka wanaagsan ee iskaa ah.
18. Inay helaan adeegyada ilaalshan iyo adeegyada u doodidsta.
19. Ilaalinta qarsoodiga macluumaakda gaarka ah, ay ku jiraan diiwaanada maaliyada iyo caafimaadka, si waafaqsan sharciyada la adeegsado.. Baadha oo codsada koobiyada macluumaadka caafimaadka la isticmaalay si loo gaadho go'aamo ku saabsan daryeelkooda oo loo sharaxo macluumaadka oo loo fasiro sidii mid ku habboon gudaha muddada wakhtiga macquulka ah, si waafaqsan sharciyada lagu dabaqo.
20. Codsada helida in uu baadho oo helo koobi, codsada wax ka beddelka, oo codsada xisaabaadka shaacinta macluumaadka caafimaadkeeda ama kiisa si waafaqsan sharciga iyo xeerka.
21. Hela warbixinta kharashyada adeegyada la bixiyay oo hela jawaabaha su'aalo kasta.
22. Garta xidhiidhka xarunta bixinaysa daryeelku la leedahay adeeg bixiyayaashada daryeelka caafimaadka, machadayada waxbarashadda iyo lacag bixiyayaasha, marka ay la xidhiidho daryeelkooda.
23. Hela macluumaadka ku qoran qaab ku haboon da'da bukaanka, luqadda, iyo kartida lagu fahmo. Tan waxaa ka mid ah bixinta adeegyada turjumaada hadalka ah/ tujumaada qoraalka iyo macluumaadka buuxiya baahiyaha bukaanka ee aragtiyahan, hadalka, maqalka ama liidashada garaadka.
24. Sheega cabashooyinka, cabashoyinka iyo walaacyada iyo/ama ku taliya isbeddelo xor ah iyaddoon lagu samayn wax khasbid ah, takoor, aargoosi, ama faro gelinta macquulka ee daryeelka, ilaa waaxda halka adeegyada lagu bixiyo. Waydiiya in lala hadlo daryeel bixiye dhow, maareeyaha waaxda ama maamulaha, kormeeraha kalkaaliska, ama wakiilka bukaanka xidhiidhka lambarka (859) 301-5581 (Edgewood), (859) 572-3126 (Ft. Thomas), (859) 212-5291 (Florence), ama (812) 496-7349 (Dearborn).
25. Inay xaraystaan cabashada Qaybta Xarumaha daryeelka Caafimaadka iyo Adegeyada iyaddoon loo eegin haddii ay isticmaalaan nidaamka cabashada St. Elizabeth Healthcare. Lambarka telefoonka iyo cinwaanka deegaanka ee waaxda gobolka Kentucky waa: Office of the Inspector General Division of Health Care Facilities and Services P.O. Box #12250 Lexington, KY 40582-2250 Phone: (859) 246-2301

26. U gudbi cabasho Waaxda Caafimaadka Indiana iyadoon loo eegin inay isticmaalaan habka cabashada St. Elizabeth. Macluumaadka xiriirka Waaxda Caafimaadka ee Indiana waa:
Indiana Department of Health
2 N. Meridian St. Indianapolis, IN 46204
Phone: Talefoonka (317) 233-7241 ama (800) 246-8909
27. La xidhiidh Guddiga Wadajirka ah iyada oo aan loo eegin haddii ay isticmaalaan habka cabashada ee daryeelka caafimaadka St. Elizabeth ee daryeelka laga helo xarumaha Edgewood, Florence, ama Ft Thomas. Guddida Wada jirka macluumaadkeeda xidhiidhka: Telefoonka: 1-800-994-6610 Iimaylka: complaint@jointcommission.org
28. La xidhiidh Guddiga Aqoonsiga Daryeelka Caafimaadka iyada oo aan loo eegin haddii ay isticmaalaan habka cabashada St. Elizabeth Healthcare ee daryeelka laga helay xerada Dearborn. Macluumaadka xidhiidhka Guddida Aqoonsiga Daryeelka Caafimaadka waa: Telefoonka: (855) 937-2242 Iimaylka: complaints@achc.org
29. Lagu wargeliyo aqoonsiga shakhsiyaadka muhiim ahaan ka masuul ah oo siinaya daryeelka, daawaynta, adeega.
30. Helo shaacinta buuxda (dheefaha la filayo, raaxo darrada suuragalka ah iyo khataraha, beddelaadaha, nidaamyada la raacayo) iyo bixinta oggolaanshaha la wargeliyay haddii cusbitaalku soo jeediyo inuu ka qayb qaato ama sameeyo tijaabada aadamaha saamaynsaysa daryeelka ama daawaynta, oo leh xaqa uu ku diido inuu ka qayb galo mashaariicda cilmi baadhida oo garto in diidmadooda aanay qayb ka ahaan doonin helidooda adeegyada.
31. La tasho wakiilka Guddida Anshaxa iyaddoon loo eegin go'aamada caafimaadka anshaxa.
32. Ka xor ahow isticmaalka aan la damaana qaadin ama aan macquulka ahayn ee xayiraada ama go'doominta.
33. Ka xor ahow dhammaan qaababka xad gudubka, dayaca, ka faa'iidaysiga, ama dhibaataynta.
34. Samaynta dardaaranka hore iyo in iyaga la raaco.
35. Hel qiimaynta habboon iyo maaraynta xanuunka.
36. Aqoonsashada taageerada qofka(dadka) kaas oo bukaanka u magacaabo ay ku jirto, laakiin kuma xadidna, xaaska, lamaanaha guriga (ay ku jirto lamaanaha guriga isku sinjiga ah), xubin kale oo qoyska ah, ama saaxiib oo la jooga bukaanka wixii ah taageerada dareenka muddada wakhtiga joogida. Joogitaankan qofka taageerada ah ee bukaanka doorashadiisa waa la oggol yahay ilaa qofka joogitaankiisa uu ku xad gudbo xuquuqda dadka kale, badbaadada, ama caafmaad ahaan ama daawayn ahaan mid waxyeelaysa. (Tixraac Xeerka Booqasahda Bukaanka.)
37. In la siiyo ama laga hayo oggolaanshaha lagu wargeliyay si loo soo saaro ama loo isticmaalo duubitaanada, filimada, ama sawirada kale ee bukaanka wixii ah ujeedooyinka aan ahayn daryeelkiisa ama daryeelkeeda. (Tixraac Xeerka Qaadista Fiidyaw/Sawir.)
38. Hayso oo isticmaal dharka iyo hantida gaarka ah ilaa ay tani ku xad gudubto xuquuqda dadka kale ama caafimaad ahaan ama daweyn ahaanba liddi ku ah.

## BUKAANKA KA HELAYA ADEEGYADA XAGA ELIZABETH HEALTHCARE WAXAY LEEDAHAY MASUULIYADA LA:

1. Bixiya, ilaa aqoontayda ugu fiican, macluumaadka saxda ah ee dhammayska tiran ee ku saabsan arrimaha la xidhiidha caafimaadkooda.
2. Ka bixiya macluumaadka maaliyada lama huraanka ah si loo xaqiijiyo biil bixinta saxda ah oo loo buuxiyo ballan qaadyada.
3. Si firficoon uga qayb galo horumarinta iyo fulinta qorshaha daryeelka, ay ku jiraan su'aalaha ku saabsan qorshaha daryeelka ama macluumaadka am tilmaamaha aan la fahmin.
4. Inuu soo sheego isbeddelada aan la filayn xaaladooda dhakhtarada iyo adeeg bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaadka.
5. Raaco tilmaamaha, xeerarka, sharciyada, iyo shuruucda diyaarka ah si loo taageero daryeelka tayada leh ee bukaanada iyo deegaanka badbaado u ah dhammaan shakhsiyaadka.
6. Feejignaado oo ixtiraam badan u yeesho bukaanada kale iyo shaqaalaha.
7. Taageera ka fiirsashada labbada dhinac ah iyo tixgelinta iyaddoo la ilaalinayo luqadda madaniga iyo is dhexgalka dhaqanka ee shaqaalaha iyo dhakhtarada caafimaadka.

## OGAYSIISKA GAAR AHAANSHAHA

Dhammaan bukaanada waxaa marin loo siin doonaa, oo waxaa la waydiin doonaa inay saxeexaan warbixinta qirashada ee lagu bixiyay koobiga Ogaysiiskayaga Dhaqamada Gaa ahaanshaha. Ogaysiiskan waxa uu faahfaahiyaa St. Elizabeth Healthcare ballankeeda ilaalinta gaar ahaanshaha macluumaadkaaga caafimaadka, sida macluumaadkaaga caafimaadka loo isticmaali karo oo loo shaaciyay, iyo xuquuqdaada helida macluumaadka caafimaadka.

# SHURUUDAHA TAKOOR LA'AANTA IYO GAADHIDA

St. Elizabeth Healthcare waxay u hoggaansantaa sharciyada xuquuqaha rayidka ee Federaalka oo uma takoorto qaababka isirka, midabka, asalka qaranka, da'da, nadaafadaada, ama sinjiga. St. Elizabeth Healthcare kama reebto dadka ama ulama dhaqanto si gaar ah sababtoo ah isirka, midabka, asalka qaranka, da'da, naafanimada, ama galmadda.

## St. Elizabeth Healthcare

- Waxay siisaa caawimo bilaash ah iyo adeegyo dadka naafadda ah si ay si waxtar leh noola xidhiidhaan, sida: Turjumaanada af dhagoolaha
- Macluumaadka ku qoran qaabab kale (farta waa wayn, maqalka, qaababka korontadda la heli karo, ama qaabab kale)
- Waxay siisaa adeegyada luqadda dadka aanay luqaddooda koowaad Ingiriisi ahayn, sida: Turjumaanada takhasuska leh
- Macluumaadka ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahantahay adeegyadan, la xidhiidh nterpreterServices@stelizabeth.com or (859) 301-2000.

Haddii aad rumaysantahay Spectrum Health inay ku fashilantay inay bixiso adeegyadan ama u takoorto qaabab kale ee ku salaysan isirka, midabka, asalka qaranka, da'da, naafada, sinjiga. waxaad cabasho u soo gudbin kartaa:

Joseph A. Rectenwald, J.D., Maamulaha, Maaraynta Khatarta/IRB
1 Medical Village Drive
Edgewood KY 41017

Telefoonka: (859) 301-6260
Fagaska: (859) 301-5549
Iimayl: Joseph.Rectenwald@stelizabeth.com

Waxaad ku soo gudbin kartaa cabashada qof ahaan ama warqad boosta lagu soo diray, fagas, ama iimayl. Haddii aad u baahantahay inaad soo xarayso cabasho, Joseph A. Rectenwald waa la heli karaa si ay kuu caawiso. Waxaad sidoo kale ku soo xarayn kartaa cabasahda xuquuqda aadamaha U.S. Department of Health and Human Services, koronto ahaan dhexda Xafiiska Xuquuqaha Aadamaha Degelka cabashada ee laga heli karo bogga:

https://ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf, ama boostada ama taleefanka oo ah:

Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Aadamaha (U.S. Department of Health and Human Services)
200 Independence Avenue,
SW Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201

(800) 368-1019
(800) 537-7697 (TDD)

Foomamka cabashada waxaa laga heli kara www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.

# SHURUUDAHA TAKOOR LA'AANTA IYO GAADHIDA

注意：如果您使用繁體中文，您可以免費獲得語言援助服務。請致電 1-859-301-2000。

ACHTUNG: Wenn Sie Deutsch sprechen, stehen Ihnen kostenlos sprachliche Hilfsdienstleistungen zur Verfügung. Rufnummer: 1-859-301-2000.

CHÚ Ý: Nếu bạn nói Tiếng Việt, có các dịch vụ hỗ trợ ngôn ngữ miễn phí dành cho bạn. Gọi số 1-859-301-2000.

ملحوظة: إذا كنت تتحدث اللغة العربية، فإن خدمات المساعدة اللغوية تتوافر لك بالمجان. اتصل على الرقم 1-859-301-2000.

PAŽNJA: Ako govorite srpsko-hrvatski jezik, usluge jezičke pomoći dostupne su vam besplatno. Nazovite 1-859-301-2000.

注意事項：日本語を話される場合、無料の言語支援をご利用いただけます。1-859-301-2000 まで、お電話にてご連絡ください。

ATTENTION : Si vous parlez français, des services d'aide linguistique vous sont proposés gratuitement. Appelez le 1-859-301-2000.

주의: 한국어를 사용하시는 경우, 언어 지원 서비스를 무료로 이용하실 수 있습니다. 1-859-301-2000.번으로 전화해 주십시오.

Wann du [Deitsch (Pennsylvania German / Dutch)] schwetzscht, kannscht du mitaus Koschte ebber gricke, ass dihr helft mit die englisch Schprooch. Ruf selli Nummer uff: Call 1-859-301-2000.

ध्यान दनिहु ोस: तपाईंले नेपाली बोल्नहु न्छ भने तपाईंको ननम्तत भाषा सहायता सेवाहरू ननःशिलु क रूपमा उपलब्ध छ। फोन गनहु ोस् 1-859-301-2000.

HUBACHIISA: Yoo afaan Oromoo dubbachuu dandeessu ta'e tajaajila gargaarsa afaanii kaffaltii malee argattu. Bilbilaa 1-859-301-2000.

ВНИМАНИЕ! Если вы говорите по-русски, то можете бесплатно пользоваться услугами перевода. Звоните 1-859-301-2000.

PAUNAWA: Kung nagsasalita ka ng Tagalog, may makukuha kang mga libreng serbisyo ng tulong sa wika. Tumawag sa 1-859-301-2000.

ICO KWITONDERA: Namba uvuga Ikirundi, serivisi z'ugufasha mu biraba indimi, k'ubuntu, ziragutegekanirijwe. Woterefona 1- 859-301-2000.

# JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO

## KHIBRADAADA XAGA ELIZABETH

Dhammaan shaqaalahayagu waxay doonayaan inay helaan qaabka ugu waayo araganimada fiican ee bukaanka muddada joogidaada xaga St. Elizabeth Healthcare. Waxaanu fahamnay in ku jirada cusbitaalku ay werwer badnaan karo iyo, wakhtiyada qaarkood, waayo aragnimo culus ay tahay.

Fadan ii sheeg inaan samayn doono dedaal kasta oo aanu ku filano oo ku xaqiijino baahiyahaaga iyo filashooyinka in la buuxiyay. Si adag ayaanu u shaqayn doonaa si aanu qolkaagu nadiif uga dhigno siiba sida aagaga kale ee aad booqato marka aad nala joogto anaga. Waxaanu ku bari doonaa xubnaha kooxdaada daryeelka caafimaadka oo waxaanu sharaxi doonaa waxa dhici doona iyo inta ay qaadan doonto markaas adiga iyo qoyskaaga si wanaagsan ayaa la idinku wargeliyaa. Waxaanu kaa caawin doonaa inaan kaa dhigno mid raaxo badan sida suuragalka ah. Waxaanu falan qayn doonaa qorshahaaga daryeelka, dawooyinkaaga iyo bixinta tilmaamaha.

Badanku dhammaan, waxaanu kuula dhaqmi doonaa qaabka anaga ama kuwa ehelka ah ay doonayaan in laguula dhaqmo.

Waxaanu soo dhawaynaynaa fursada aanu war kaga maqalno waayo aragnimadaada. Haddii aad rabto inaad wadaagto macluumaadkaag, dareen xoriyada aad ku dhammaystirto CareGram taas oo laga heli karo xarumaha ama onlayn bogga stelizabeth.com.

## WAKHTIGA LOOGU TALO GALAY

Waxaanu ku ballan qaadaynaa gudbinta waayo aragnimada bukaanka gaarka ah wakhtiga joogidaada xaga St. Elizabeth Healthcare.

## WAXYAABAHAAGA QIIMAHA LEH/ SHEEYADA GAARKA AH

Joogida aad nala joogto, keen keliya sheeyada gaarka ah ee aad dareento inay lama huraan tahay. St. Elizabeth Healthcare masuulnimada looma qabsan doono wixii ah alaabta qiimaha badan iyo sheeyada gaarka ah. Waxaad rabi kartaa inaad guriga ugu sii dhiibto qoyska ama saaxiibada ama aad codsato sheeyada lagu riday khasnada.

Cusbitaalku waxa uu ka masuul yahay alaabta qiimaha leh ee lagu riday khasnada. Haddii aad keento qadar badan oo lacag ah cubsitaalka keliya u hayso dhowr doolar oo keliya si ay u daboolaa kharashka wargeeska, jariidada iyo waxyaabaha kale ee yimaada. Badbaadaada, fadlan haka soo qaadan qalabka korontada guriga, sida telefeeshinada ama raadyowyada. Haddii aad xidhato ilkaha macmalka ah, muraayadaha wiilka lagu dhejiyo ama kaalmada maqalka, fadlan ku wargeli kalkaalisadaada, Weelka saxda ah waa la bixin doonaa markaas waxaa aad u dhici karta inaad meel khalad ah dhigto. Sidoo kale, midna adiga ama booqdayaashu waa inaanay soo qaadan barkimooyin, bustayaal, go'yaal ama dhar dheeraad ah. Barkimooyinka, bustayaasha iyo shuluga lagu seexdo waxaa bixiya cusbitaalka. Dedaal kasta ayaa la samayn doonaa si loo celiyo alaabtan luntay ama meel khalad ah la dhigay. Dhammaan alaabta la soo helay waxaa loo dhiibaa waaxda Adeegyada Deegaanka.

### Adeegyada Baahiyahaaga Gaarka ah

St. Elizabeth Healthcare waxay ku dedaashaa inay buuxiso dhammaan heerarka sare lagu dhigay gudaha Xeerka Naafadda Maraykanka iyo Xeerka Daryeelka ee 1973 si loo caawiyo bukaanada/booqdayaasha qaba baahiyaha gaarka ah. Turjubaanada takhasuska leh ee dhegoolaha iyo/ama dadka maqalku ku adag yahay waa la diyaarin karaa. Shaqaalahayaga waxay samayn doonaan dedaal kasta si loo helo turjubaano caawiya kuwan aan Ingiriisiga ku hadlin. Teknoolajiga taakulada leh sida qalabyada wada xidhiidhka ee dhegoolaha, telefoonada wata qalabka maamulka dalacaada, iyo sameecadaha gaarka ah waxaa loo heli karaa dhegoolaha iyo/ama bukaanada maqalku ku adag yahay muddada joogitaankooda. Alaadaha qaybaha qoraalada ah waxaa laga heli karaa dhammaan goobaha. Haddii aad qabto liidashada jidhka oo aad ka faa'iidayso qalabyada taakulada; sida la qabsashada weelka wax cunida, telefoonka wayn ee lambarada leh, muraayadaha akhriska ama nalka wicitaanka gaarka ah, fadlan la xidhiidh kalkaalisadaada. Biraha gaadhi curyaanka meel lagu saaro, xamaamyada, iyo meelaha baabuurta la dhigto waxaa laga bixiyaa goobo kala duwan dhammaan cusbitaalada. Soo wac Amniga Adeegyada Kalkaaliska haddii adiga ama booqdayaashaadu aad qabtaan baahiyaha gaarka ah.

## BOOQASAHADA BUKAANKA

St. Elizabeth Healthcare waxay sare u qaadaa oo taageertaa bukaanka iyo habka qoyska ku salaysan si loo daryeelo oo waxay aqoonsataa ahmiyada u ogaalanshaha xubnaha qoyska iyo shakhsiyaadka kale inay la joogaan bukaanka wixi taageero dareen ah muddada wakhtiga joogidooda. Guud ahaan, xubnaha qoyska iyo booqdayaasha waxaa la soo dhawaynayaa 8 subaxnimo ilaa 8 habeenimo Si ay u caawiyaan bukaananda inay bogsadaan oo aan si aad ah loo daalin bukaanada, booqashooyinku waa inay koobnaadaan, degenaata oo farxad lahaa. Bukaanka ama waliilka bukaanka loo igmaday, si la xidhiidha kalkaalisada iyo kooxda daryeelka caafimaadka, waxay samayn karaan xadidaad dheeraad ah qoyska iyo booqdayaasha, gaar ahaan qaybaha daryeelka xoogan. St. Elizabeth waxay oggolaataa joogitaankan qofka taageerada ah ee bukaanka doorashadiisa, laa qofka joogitaankiisa uu ku xad gudbo xuquuqda dadka kale, badbaadada, ama caafmaad ahaan ama daawayn ahaan mid waxyeelaysa.

### Carruurta

- Carruurta ka yar da'da 14 waa inaanay si caadi ah u soo booqan.
- Asbaabaha badbaadada awgeed, booqashada carruurtu waa mamnuuc marka bukaanka uu ku jiro feejignaanta go'doominta. Duruufaha gaarka ah, shaqaalaha kalkaalisada waxay la tashan karaan Xakamayn Caabuqa.
- Carruurta looma oggol inay habeenka ku dhaxaan.
- Carruurta waa inay la socdaan dad waa wayn wakhtiyada oo dhan. Carruurta waa in aan lagaga tegin bukaanada daryeelka si waafaqsan duruufa kasta.

# JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO

## SAACADAHA BOOQASHADA GAARKA AH

### Meesha Dhalashada Qoyska

Marka ay suuragal tahay, taageerada qofka(dadka) waxay u joogi doonaan oggolaanshaha iyo hagitaanka Meesha Dhalashada Qoyska oo waxaa lagu dari doonaa wax barida i yo nidaamyada ka bixida cusbitaalka.

Bukaanka, dhakhtarkeeda daryeelaya iyo kalkaalisa, waxay go'aan ku gaadhayaan tirada booqdayaasha muddada shaqada, umulida iyo wejiyada bogsashada. Laakiin, bukaanada waa inaanay haysan wax ka badan afar booqdayaasha ah wakhtigiiba. Waxaanu ku dhiriigelinaynaa wakhti degen oo hooyada-ilmaha gudaha galabtii si sare loogu qaado nasashada iyo isku xidhnaanta.

Hal booqde wakhtigiiba ayaa la oggol yahay baadhitaanka/qolka nasashada.

Soo xaadirka qaliinka uurka waxay ku xadidan tahay hal qof oo doorashada bukaanka ah. Dhakhtarkan daryeelaya iyo/ama dhakhtarka suuxinta waxay go'aamin doonaan haddii joogitaanka taageerada qofku ay habboon tahay iyaddoo ku salaysan xaalada bukaanka.

Carruurtu waa inay ahaadaan 14 sanadood ama ka wayn si loo booqdo iyaddoo ay yihiin walaalaha dhalaanka mooyaane. Carruurta waa inuu raacaa qof wayn oo masuul ah oo aan ahayn bukaan wakhtiyada oo dhan.

Waalidku waxay keeni doonaan carruurta wadaa calaamada jirada, caabuqa, ama kuwan uu gaadhay cudurada la is qaadsiiyo ee qaybta. Booqdayaasha waxaa dhici karta in muuqaal ahaan ay ka baadhaan shaqaalahu kalkaaliska markaay yimaadaan qaybta calaamadaha cudurada faafa (tusaale ahaan finanka qandhada, qufac ama finan). Muddada xiliga hargabka, booqashooyinka walaalaha waa la xayiri doonaa ama waxaa loo bahaan doonaa caddaynta tallaalka hargabka ah ugu yaraan labba todobaad ka hor booqashada, iyaddoo ku salaysan talooyinka ka yimid Waaxda Xakamaynta Caabuqa, Xarumaha Xakamaynta Cudurka iyo Gollaha Wayn ee Caafimaadka Cincinnati. Haddii ilmahaaga la dhigo NICU, waxaa lagu siin doonaa hagitaanada booqdaha ee NICU.

### Waaxda Gurmadka

Iyaddoo ay sababtay baahiyaha daran ee Waaxda Gurmadka bukaanada iyo xadidnaanta deegaanka, booqashada waxay ku xadidan yihiin inay lahaadaan labba booqdayaal ah bukaankiiba gudaha aaga daawaynta. Intaa waxa dheer, muddada daawaynta, qofka taageerada loo qorsheeyay waxa uu raaci karaa bukaanka marka uu codsado. Qofka taageerada loo qorsheeyay sidoo kale waxa uu u raaci karaa bukaanka aaga daawaynta.

### Xadidnaanta Booqasahda Dheeraadka ah

Mudnaanta booqasahda waxaa lagu xadidi karaa wakhti kasta iyaddoo ku salaysan xaalada bukaanka ama codsi.

Bukaanada booqdayaasha ee la ilaalinayo looma oggola booqdayaasha iyaddoo si gaar ah uu u ansixiyo booliska ilaalinayo ama masuuliyiinta jeelku mooyaane.

Dhacdada masiibo/cudur safmar ah, ama tilmaanta waaxda caafimaadka maxaliga ah ama gobolka, mudnaanta booqasahda waa laga noqon karaa si loo ilaaliyo bukaanada, booqdayaasha iyo shaqaalaha.

Sharciyo gaar ah ayaa xukumo bukaanada go'doominta booqdayaasha - shaqaalahu waxay bixin doontaa tilmaanta booqdayaasha.

**Si loo ilaaliyo bukaankeena, xayiraadaha ayaa dhaqan gal ka ah xarumaha marka xaaladaha soo socdaa ay jiraan:**

- Marka xubnaha qoyska iyo booqdayaasha ay qabaan astaamaha durayga, qufac, hargab, san duuf leh, hunguri xanuun, boogaha hargabka, matag, shuban, qandho, finan ama caabuqa maqaarka.
- Marka bukaanku uu ku jiro dawaynta ama wax ka qabashada farago gelinaysa qorshaha daryeelka.
- Marka booqdayaashu ay muujiyaan dhaqanka kharibaada ah ee ku keena khatarta tooska ah shaqaalaha ama bukaanada kale.
- Marka bukaanka ama qofka qolka lala galo u baahan yahay gaar ahaansho ama uu helayo darlyeel.
- Marka ay jirto amarka maxkamada xadidaysa ama xayiraysa xidhiidhka.
- Marka borotokoolada daawaynta isticmaalka maandooriyaha ay u baahan yihiin booqasahda xayiran gudaha qorshaha daryeelka.
- Marka daawayntu xadidno meesha jidhka ah ee loo heli karo si qaab raaxo leh ugu qaado booqdayaasha.

## QOLALKA BOOQDAHA

Aaga yar ee sugitaanka ee ku yaala dabaqa bukaanka. Aagagan waxaa isticmaali kara booqdayaasha sugaya inay tagaan qolalka bukaanada iyo booqdayaashooda raba inay in ku booqdaan dibada qolalkooda. Fadlan kula tali kalkaalisadaada marka aad ka baxayso qolka. Qolalka waxaa loo isticmaala dhammaan booqdayaasha bukaanada oo waa inay isticmaalin keliya hal koox ahi.

## OGAYSIISKA DHAQANKA

Tixgeli qiyamka muhiimka ah ee St. Elizabeth Healthcare. Markaas waxaan ku sin karnaa daryeel dhammaystiran oo naxariis leh, waxaanu waydiin karnaa in bukaanadayada iyo booqdayaashu ay taageeraan deegaan badbaadiyo bogsasho leh.

Luqadda dagaalka leh ama dhaqanka rabshada leh looma dul qaadan karo dhulka cusbitaalka.

**Tusaalooyinka dhaqanka dagaalka ama rabshada leh waxaa ka mid ah:**

- Weerarka jidhka ah.
- Dhibaataynta hadalka ah.
- Luqadda aflagaadada ah.
- Luqadda galmada ah ee kuwa kale loola jeedo.
- Hanjabaado.
- Ku guul daraysiga in laga jawaabo tilmaamaha shaqaalaha.

# JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO

Waxaa jira dulqaadka ebarka ee dhammaan qaababka dagaalka ah. Noocyadan shilalka ah waxay keeni karaan in laga saaro xaruntan, xidhida suuragalka ah iyo dacwad ku oogid.

St. Elizabeth Healthcare si buuxda waxay u taageertaa xidhiidhada uga warbixinaya sharci fulinta dhaqanka dagaalka ama rabshada ah ee ay la kulmaan gudaha cusbitaalka.

Waxaanu qiimaynaa iskaashigiina ilaalinta deegaanka, daawaynta deegaanka ee dhammaan.

## BAABUUR DHIGASHADA

**Ma jiraan kharashka baabuur dhigashada gudaha ah. Fadlan dhigo goobahaas ku habboon:**

- **Booqdayaasha:** Baabuurka dhiga goobaha geerashka xarun kasta oo St. Elizabeth Healthcare ah kharash la'aan.
- **Bukaanada:** Baabuurka dhigo gudaha xarunta ugu dhow adeega ay helayaan (tusaale ahaan, gurmadka, bukaan socodka ama daawaynta jidhka).

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan baabuur dhigashada, waxaad la xidhiidhi kartaa waaxda Amniga St. Elizabeth Healthcare addoo soo wacaya (859) 301-2270.

## CUNTOOYINKAAGA

Qolka adeega cuntooyinka waxaa lagu siiyaa bukaanada bilaash dhanka Waaxda Adeegyada Nafaqadda. Waxaad ka dooraan cuntadda darayga ah, quraac dalab lagu sameeyo, qaddo iyo casho maalin kasta dhanka liiska qaabka makhaayada ah. Marka aad awoodo inaad cunto, soo wac qolka Culinary Creation qolka lambarka adeega si aad u dalbo cunto.

- Xaga Dearborn, garaac gudbinta. 16368 wakhtiga u dhexeeya 6:30 subaxnimo iyo 7 fiidnimo.
- Xaga Edgewood, garaac gudbinta. 12600 wakhtiga u dhexeeya 6:30 subaxnimo iyo 8 fiidnimo.
- Xaga Florence/Ft. Thomas, garaac gudbinta. 16368 wakhtiga u dhexeeya 7 subaxnimo iyo 7 fiidnimo.
- Xaga Degmadda Grant County, garaac gudbinta. 48222 wakhtiga u dhexeeya 7:45 subaxnimo iyo 6 fiidnimo.

Adeega qolka gaar loo tababaray "Safiiro" ayaa loo magacaabaa si ay kaaga caawiyaan liiska cuntadda oo kuugu sharaxaan nidaamka dalbashada. Safiirkaaga gaarka ah ayaa ku soo diri doona cuntadaadaa tarayga saaran 45 daqiiqo gudahood marka la dalbado. Marka lagu daro cuntooyinka caadiga ah, qayb cuntadda fudud ah ayaa ku yaala kijada qayb kasta oo kalkaaliska ah ama waxaa laga heli karaan dhexda Samaynta Cuntadda (Culinary Creations).

Waaxda Adeegyada nafaqada waxaa ka go'an inay ku siiso adeegyo cunto oo gaar ah.

## TELEEFESHANKA

Adeegyada telefeeshanka waxaa loo bixiyaa bilaash gudaha qol kasta oo bukaan.

## TELEFOONADA

Si loo waco meel kasta gudaha St. Elizabeth Healthcare, garaac keliya shanta tiro ee u dambeeya lambarkaaga telefoonka.

Telefoonada waxaa laga heli karaa dhammaan qolalka bukaanada, laga reebo Qaybta Caafimaadka Dhaqanka.

Si aad u samayso wicitaanka dibada ah: Garaac 9 laynka maxaliga dibada ah, ka dib garaac lambarkaaga.

**Wicitaanka Bilaashka ah:**

9 + 1 + 800 + lambarka
9 + 1 + 877 + lambarka
9 + 1 + 888 + lambarka

**Sii qaadashada, kaadhka wicida ama wicitaanada kooxda saddexaad.**

8 + 0 + koodhka aaga + lambarka

**Shiradaha qaadayaasha ah ee fogaanta dheer ee kale**

Garaac "0" shaqaalaha cusbitaalka si uu kuu caawiyo.

**Dhibaatooyinka kale ee garaacida:**

Garaac "0" shaqaalaha telefoonka cusbitaalka.

# JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO

## SHURAAKDA DARYEELKA

Samaynta waayo aragnimo aan caadi ahayn oo bukaanada iyo ehelka ah.

Waxaanu dhisnaa dawaynta la horumariyay ee deegaanka bukaanada St. Elizabeth iyo qoysaskooda, laakiin maaha wax ku saabsan gooba ganacsi. Waa dhaqankayaga - waa xoog saarida aadka ah ee iskaashiga lala samaynayo bukaanadayada iyo ehelkooda daryeelka wanaagsan, waayo aragnimada caadiga ah iyo natiijooyinka gaarka ah.

Dhexda Shuraakada Daryeelka waxaanu ka shaqaynaynaa koboca iskaashiga u dhexeeya bukaanka, qoyska bukaanka iyo/ama ehelka iyo kooxda daryeelka caafimaadka. Ka qayb qaadashada iyo ku lug lahaanta bukaanadayada iyo ehelka nidaamkan waxa uu noo oggolaadaa inaan horumarino qorshayaasha daryeelka la gaar yeelay oo waxtar leh oo ku salaysan baahiyaha iyo qiyamka bukaan kasta. Waxaanu ku dedaalnaa wada xidhiidh naxariis leh iyo fahanka is dhexgal kasta, daryeelka ugu tayada sareeya ee bukaan kasta, iyo waayo aragnimada macnaha buuxa leh ee natiijooyinka wanaagsan ee qof kasta oo ka qayb ah.

Mid ka mid ah hadafyada muhiimka ah ee nidaamkan waa in la caawiyo furida laymanka wada xidhiidhka u dhexeeya adiga, ehelkaaga iyo kooxda St. Elizabeth Healthcare. Waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad kala qayb gasho ka warbixinta sariirta dhinaceeda kalkaaliyayaashaada. Joornaalka wada xidhiidhka, qalin iyo kiishka dhokumentiga ayaa la bixiyay si ay kaaga caawiso isticmaalka wakhtiga iyo ka dib joogidaada. Joornaalkaaga, qalinka iyo kiishka waa in lagu hayaa sariirtaada dhinaceeda joogidaada oo dhan.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Shuraakdayada St. Elizabeth dhaqanka Daryeelka ama haddii aad hayso wax faallo celin ah, su'aalo, fikrado ama sheekooyin si loo wadaago, fadlan la hadal kalkaalisada ama qaybta maareeyaha kalkaaliska.

## MYCHART BEDSIDE

Waxaanu ku faanaynaa inaanu siino saaxibadayada, jaarka iyo qoysaska daryeelka wanaagsan. Ee ka yimid dhakhtarada aan caadiga ahayn, kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha ilaa goobaha habboon, daryeelka abaal marinta ku guulaystay iyo teknoolajiga horumaray, St. Elizabeth waxay gudbisaa daryeelka caafimaadka laga dhisay baahiyaha bukaanadayada.

Mid ka mid ah qaababka ugu badan ee aan tan ku samaynaa waa dhexda dhaqanka Shuraakada Daryeelka, ee ku salaysan afar qaybood oo muhiim ah bukaanka iyo mabaadi'da ku salaysan,; tixgelinta iyo sharafta, macluumaad wadaaga, wada shaqaynta iyo ka qayb galka. Qayb dhaqankan ah waxaa ka mid ah daryeelka bukaanka labbada dhinac ah dhexda MyChart Bedside.

MyChart Bedside, ee laga soo geli karo akoonka MyChart, waxay bixisaa fursad wayn kooxda St. Elizabeth si looga qayb qaato, wax loo baro oo awood loo siiyo bukaanada iyo qoysaskooda - marka wakhti isku mid ah la isku darayo waxbarashadda bukaanka, oo sare u qaada wada xidhiidhka lala yeedho kooxda daryeelka bukaanka oo samaysa waayo aragnimo dhammaystiran oo bukaanka ah. Gudaha MyChart, waxaad ku arki kartaa macluumaadka sida kooxdaada daryeelka, waxa uu yahay baadhidaanka ama nidaamyada la qorsheeyay, raad raac horumarkaaga, siiba gaadhida dhammayska tiran ee fiidyowga waxbarashadda caafimaadka.

Haddii aanad lahayn akoonka MyChart, fadlan waydii kooxdaada daryeelka wixii ah ka shaqaysiinta lambarka koodhka ah.





## CAREGRAM

### Qirashada kuwan run ahaan sare mara oo sii dhaafa.

Xaga St. Elizabeth Healthcare, waxaanu ku ballan qaadaynaa inaan ku siino daryeelka suuragalka ah ee u wanaagsan adiga iyo qoyskaaga.

**Ma rabtaa inaad wayo aragnimo nala wadaagto?**

Iskaan saar koodhka QRm booqo stelizabeth.com/caregram ama ka codso foomka kooxdaada daryeelka si aad noogu sgeeto wax ku saabsan booqashadaada. CareGram waa qaabka bukaanka iyo kuwa la jecel yahay ay ku bixiyaan faallo celinta sida aanu u saamanynay booqashadaada, hadidi aad doonayso inaad wadaagto sida dhakhtarkaaga ama shaqaalahaaga St. Elizabeth ay u dhaafeen oo uga fogaadeen ama noo sheeg sida aanu u horumarin karno.



# JOOGIDAADA AAD NALA JOOGTO

## INTERNARKA BILAASHKA AH EE AAN WAAYIR LAHAYN

Gelida internatka aan waayirka lahayn waxaa laga heli karaa dhammaan St. Elizabeth Covington, Dearborn, Edgewood, Florence, Ft. Thomas iyo Grant, markaas bukaanada, booqdayaasha, dhakhtarada iyo shaqaalahu waxay ku xidhmi karaan internatka marka ay joogaan xarunta. Adeega Wireless Fidelity (WiFi) waxaa laga soo geli karaa kombuyuutar kasta ama qalabka gacanta lagu hayo oo uu wada nidaamyada hadda, heerka shaqaynta. Shabakada waxaa loogu yeedhaa SEH Public. Kombuyuutarada ma bixiyo cusbitaalka, laakiin bukaanada ama martida keena komobuyuutarooda laabtobka ama qalabyada gacanta lagu hayo waxay ku xidhmi karaan internatka bilaash ahaan.

## WAXYAABAHA CAAWIMADA BADAN EE LA OGAANAYO MARKA AAD KU JIRTO CUSBITAALKA

**Waxaad qayb ka tahay kooxda daryeelka.** Waxaad xaq u leedahay inaad fahanto daryeelkaaga. Masuuliyadaada in la waydiiyo su'aalaha oo waxay ku lug lahaan doonaan go'aamada daryeelka.

**Waxaanu sharaxi doonaa waxyaabo badan adiga muddada joogidaada**, markaas haddii aad qabto wax dhibaatooyin ah oo hadalka, akhriska, maqalka, ama fahanka ah, fadlan na ogaysii.

**Haddii aad qabto wax walaacyada** badbaadada ah muddada joogidaada. fadlan u sheeg kalkaalisadaada ama xubin kasta oo shaqaalaha cubsitaalka ah.

**Fadlan hubso in dhammaan shaqaalahu ay dhaqaan gacmahooda ama isticmaalaan jelka gacanta jeermis dilaha ah ka hor iyo ka dib markay ku daryeelayaan adiga.** Waxaanu ku talinaynaa in adiga iyo booqdayaashaada sidoo kale ay dhaqaan gacmahaaga inta badan.

**Caafimaadkaaga iyo badbaadada,** waxaanu dhiirigelinaynaa isticmaalka maaskaraha qof kasta oo muujinaya calaamadaha caabuqa neefsashada, sida hargab ama duray. Kuwan jiran waa inaanay soo booqan.

**Haddii aad qabto xaalado gaar ah oo faafa,** shaqaalaha iyo booqdayaashu waxay u baahan doonaa feejignaan dheeraad ah si ay kuu ilaaliyaan adiga iyo kuwa kale. Feejignaantan way kala duwanaan karaan sida waafaqsan xaaladaada oo waa laguu sharaxi doonaa adiga. Wakhtiga xiliga hargabka iyo durayga, booqdayaasha way xadidnaan karaan, gaar ahaan carruurta.

**Maaraynta xanuunka waa qayb muhiim ka ah daryeelkaaga.** Marka xanuun baabiinta buuxda aanay suuragal ahaan karin, waxaanu kula samayn doonaa iskaashi si loogu maareeyo xanuunkaaga ilaa heerka la aqbali karo. Kalkaalisadaada waxay sharaxi doonaan nidaamkan iyo macluumaadka dheeraadka ah waxa uu ku jiraa buug yaraha lagu siiyay adiga.

**Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan dawooyinkaaga,** fadlan waydii kalkaalisadaada. Haddii lagu siiyo dawo aanad aqoonsan, fadlan ogaysii kalkaalisadaada isla markaaba.

**Haddii qoyskaagu arko wax isbeddelo ah oo xaaladaada ah oo khusaysa iyaga**, waa inay la xidhiidhaan kalkaalisadaada. Haddii uu qoyskaagu dareemo walaacyadooda inaan la daryeelayn, waxaa ka soo garaaci karaan 2-2222 lambarkaaga oo waxay waydiisanayaan shaqaalaha isku xidhka telefoonada inuu iyaga kugu xidho Kooxda Jawaabta Degdega ah.

Kooxda Jawaabta Degdega ah waa kooxda xirfad yaqaanada caafimaadka si heer sare ah loo tababary. haddii uu jiro isbeddel khatar ah oo bukaanka xaaladiisa caafimaadka kooxdu waxay ka caawisaa kalkaalisada bukaanka iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka si looga hortaggo gurmadka caafimaadka.

**Qaar ka mid ah isbeddelan waxaa ka mid ahaan kara:**

- Dhibta neefsashada.
- Xabad xanuun xoog leh.
- Dhiig baxa kordhay.
- Wareerka, cadhada, suuxdinta ama isbedelada kale ee maskaxda.
- Isticmaalka xamaamka in badan ama in yar ah.
- Dhaqan aan caad ahayn, ama shay "aan sax ahayn" ee bukaanka.

Fadlan ha cadhoon haddii aanu badanka ku waydiino adiga magacaaga iyo taariikhda dhalashada. Ma nihin kuwa ilow badan, waxaanu si buuxda u doonaynaa inaanu hubsano inaad hesho dawooyinka iyo daawyanaha laguugu talo galay adiga oo aan ahayn qof kale.

***Iyaddoo ay sababtay xaaladaada caafimaadka, deegaanka aan la aqoon ama dawooyinka, waxaad khatar badan ugu jirtaa dhicitaanka.***

**Si looga hortago dhicitaanka:**

- Fadlan caawimo waydiiso markaad doonayso inaad kacdo.
- Hakuu dhawaado qalabka wicida kalkaalisadaada.
- Hubso inaad xidhato dacaska aan siiban ama kabo.

***Waxaanu rajaynaynaa in tilmaamahan ay waxtar badan leeyihiin oo ay raaxo badan ku siiyaan. Waxaanu kaaga mahad naqaynaa mudnaanta daryeelidaada.***

# BADBAADO KUGU ILAALINAYA

## KA HORTAGGA CAABUQYADA

Waxaanu haynaa tallaabooyin gaar ah si looga hortaggo caabuqyada marka aad joogto cusbitaalka. Waxaa jira qayn waxyaabaha qaar aad samayn karto si aad u caawiso:

**Nadaafada gacanta:** Tani waa shayga ugu muhiimsan labbada bukaan iyo shaqaalaha daryeelka caafimaadkuna way samayn karaan si ay uga hortaggaan faafida jeermiska. Taasi waa sababta aanu kuu dhiirigelinayno adigu inaad na waydiiso haddii aanu dhaqnay gacmahayaga. Fadlan dhaq gacmahaaga siiba. Iyo, xusuusi booqdayaashaada inay dhaqaan gacmahooda marka ay gelayaan ama ka baxayaan qolkaaga.

**Qaliinka:**

- Ha taaban nabarkaaga ama dhaymahaaga.
- Ha xiirin aaga ka qaliinka ka hor qaliinka. Haddii loo baahdo, dhakhtarkaagu waxa uu isticmaali doonaa maqasyada si uu jaro timo kasta.
- Hubso inaad garanayso sida loo daryeelo nabarka qaliinka ka hor tegida guriga.
- Waxaanu ku bari doonaa inaad u feejignaato calaamada caabuqa (guduudni, qandho, dheecaan, xanuun) oo aad ku feejignaato dhakhtaraaga ama kalkaalisdada wax kastoo ka mid ah astaamahan.

**Laynka (IV) dhexe ama gacanta, katiitarka IB:**

- Ha taaban IV gaaga ama dhaymaha.
- Ogaysii dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad qabto su'aalo ku sabasan IV ama inta ay ku jiri doonto meesha.
- Waxaanu nadiifin doonaa goobtaada IV, laakiin haddii dhaymahu debco ama aaga boog tahay ama jilicdo, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga ama kalkaalisada isla mnarkaaba.

**Katiitarka kaadida: Tuumbada la geliyo kaadi haysta si ay u soo qaado kaadida.**

- Had iyo jeer ku hay kiishka ay ku jirto kaadidaadu heer ka hooseeya kaadi haystaada.
- Ha jiidin, ama jiidin ama ha oggolaan tuumbadi inay qaloocsanto.
- Waydii dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad weli u baahan tahay katiitarka

## BADBAADADA MACMIILKA

St. Elizabeth waxay ku dedaashaa inay bixiso deegaanka badbaadada ah ee bukaanadayada, booqdayaasha iyo shaqaalaha. Waxaanu waydiinaa inaad noqoto ka qayb gale firfircoon addoo ku celcelinaya tallaabooyinka badbaadada soo socda:

### Sare U hadal!

Sare U hadalku waxa uu dhiirigeliyaa bukaanadu inay ka qayb qaataan daryeelkooda caafimaadka oo sare u qaadaan badbaadada bukaanka.

**S** Sare u hadal haddii aad qabto su'aalo, walaacyo ama aanad fahmin qayb daryeelkaaga ah.

**P** U feejignow daryeelka aad helayso si loo hubiyo inaad helayso daawaynta saxda iyo daawooyinka.

**E** Bar naftaada wax ku saaban jiradaada iyo qorshahaaga daawaynta.

**A** Waydii xubin qoyska ah ama saaxiib inuu noqto u doodahaaga, la taliye ama taageere.

**K** Garo waxay yihiin dawooyinka aad qaadato iyo sababta aad u qaadato. Hayso liiska dawooyinka guriga oo keen xaga cusbitaalka.

**U** Isticmaal xarumaha daryeelka caafimaadka la aqoonsan yahay sida St. Elizabeth Healthcare.

**P** Ka qayb galka dhammaan go'aamada ku saabsan qorshaha daawayntaada; waxaad tahay xarunta kooxda daryeelka caafimaadka.

### Aqoonsiga Bukaanka

Aqoonsiga bukaanka saxda ah waa qayb muhiim u ah badbaadada bukaanka. Muddada joogidaada, waxaa lagu waydiin doonaa inta badan inaad aqoonsato naftaada adoo ku bilaabaya magacaaga iyo taariikhda dhalashada. Waxaad sidoo kale heli doontaa calaamada gacanta lagu xidho oo wadata macluumaadka oo ay daryeel bixiyayaashu ku isticmaali doonaan si ay adiga sax kuugu aqoonsadaan. Badbaadadaadu waa ahmiyadayada koowaad.

## CAAWIMADA QAADISTA IYO DHAQAAQA

Si loo ilaaliyo labbadaba bukaanada iyo xubnaha shaqaalaha ah, siiba in la siiyo daryeel badbaado, raaxo leh, waxaanu isticmalaanaa qalab gaar ah iyo nidaamyada bukaanada u baahan kaalmada dhaqaaqa. Xaaladan fanka ah qalabka qaadida waxa uu ka caawiyaa shaqaalaha ka wareejinta bukaanada sariirta ilaa kuraasida, meel kale dhigida bukaanada iyo dhaqaaqyada kale. Shaqaalaha daryeelka bukaanku waxaa loo tababaray isticmaalka saxda ah ee qalabka oo waxay ka jawaabi doonaa su'aalo kasta oo aad ka qabto isticmaalkeeda.

# BADBAADO KUGU ILAALINAYA

## BADBAADADA TAYADA AMA WALAACYADA ADEEGA EE MACMIILKA

Waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad la wadaagto daryeel kasta oo bukaanka ah ama walaacyada badbaadada maareeyaha waaxda ama kuwan bixinaya daryeelkaaga. Haddii aad dareento in walaacaga si aan ku filnayn wax looga qabanayo, fadlan la xidhiidh waaxda Xidhiidhada Bukaanka xaga Dearborn (812) 496-7349; Edgewood (859) 301-5581; Florence (859) 212-5291; ama Ft. Thomas (859) 572-3126. Waxaa naga go'an u xalinta dhibaatooyinka si degdeg ah.

### Dawooyinka

Ha qaadan wax dawo guriga laga keenay. Haddii aad dawo soo qaadato, waxaanu ku celin karnaa guriga iyaddoo uu qaadayo xubin qoyska ah ama saaxiib ama ku hay farmasiiga ilaa aad guriga tagto. Markaad joogto halkan, qaado keliya dawooyinka uu u dalbaday dhakhtarkaagu cusbitaalkaaga joogidiisa oo ay ku siiso kalkaalisadaadu. Dawooyinka kale waxay noqon karaan kuwa khatar ah haddii lagu daro dawooyinka dhakhtarkaagu dalbaday, ama waxay faro gelin karaan natiijooyinka baadhida.

### Dabka iyo Qorshaha Masiibada

Shaqaalaha St. Elizabeth Healthcare waxay ku tababartaan dabka iyo masiibada wakhtiga caadi ahaan loo qorsheeyay markaas waxay diyaar u yihiin inay ka jawaabaan dhacdada gurmadka. Haddii aad maqasho digniinta, ha nixin, maadaama tan maangal ahaan ay ishaarto tababarka. Fadlan sug tilmaamaha ka yimid shaqaalaha dabaqaaga.

### Nadaafada Neefsashada, Qaabka dhaqanka Qufaca

**Fadlan naga caawi ka hortagga faafida jirooyinka neefsasahda adoo raacaya tilmaamaha soo socda ee xakamaynta qaranka ee caabuqa.**

- U dhaq gacmahaaga inta badan iyo marka lagu wasakheeyo dheecaanka neefsashada. Masaxida aan biyaha lahayn, ee alkoosha leh waxaa laga heli karaa cusbitaalka oo dhan iyo waxay u dishaa jeermiska si degdeg ah.
- Dabool afkaaga iyo sanka marka aad qufacayso ama hindhisayso. Tiishka ayaa la heli karaa oo waa in lagu ridaa salada qashinka isticmaalka ka dib.
- Maaskarooyinka waxaa la siiyaa dadka qaba astaamaha jirada neefsasahda. Waa in lagu daadiyaa salada qashinka marka ay qoyan yihiin, wasakhaysan yihiin ama jeexmeen, oo lagu beddelaa maaskaro cusub.

***Waad ku mahadsan tahay inaad nagu soo biirto dagaalka ku lidka ah caabuqayada.***

**Si la isaga Ilaaliyo Dhicida Muddada Joogidaada Cusbitaalka Had iyo jeer:**

1. Xidho dacaska aan lahayn raysmagaadho siibanaysa marka la socdo.
2. Waydiiso caawimo haddii aad dareento itaal daro, dawakhaad ama dayaan marka aad u baahan tahay inaad kacdo.
3. Saacada digniinta xusuusinta ah waxaa la dhigi karaa sariirtaada wixii ah badbaadaada dhaqaaqa iyo soo wicida dhakhtarka.
4. Isticmaal batanka gudaha xamaamka haddii aad daciifto ama aad u baahan tahay caawimo.
5. Ku wargeli shaqaalaha kalkaaliska haddii daadasho dhacdo.
6. Waydii inuu haysto sheeyo sida miiska sariirta dhinaceed, telefoonka oo soo wac dhaqaajinta nalka la dhaqaaqo gaadhmo fudud.
7. Isticmaal wicida nalka wixii caawimo ah.

### Waxay tahay inaad Ka Ogaato ee Ku saabsan AIDS:

- AIDS (Cudurka Liidashada Difaaca Jidhka) waxaa sabab Fayraska daciifisa awooda difaaca jidhka (HIV). Waxay ku lifaaqan tahay nidaamka difaaca jidhka, oo waxay ka dhigtaa jidhka mid u nugul jiroon kala duwan.
- Daawayntu waxay ka dhigtay cudurada raaga, laakiin malaha dawo ama tallaal.

**AIDS waxaa lagu faafin karaa:**

- Xidhiidhka galmada ama dhaqamada kale ee khatarta sare ku jira ee qofka qaba cudurka halka dhiiga ama dheecaanka dhiiga la wadaago.
- La wadaagida siriijka/irbada qofka qaba cudurka.
- Hooyada qabta waxay u gudbisaa fayraska ilmaheeda ka hor ama muddada dhalashada.
- Helida dhiig wasakhaysan ama waxyaabaha dhiiga (dhif).

**AIDS kuma faafo:**

- Wadaagida cuntadda, weelka ama bilaydhada.
- Isticmaalka musqulaha dad waynaha.
- Gacan qaadka ama taabashada qof qaba HIV.
- Ku deeqida dhiiga.
- Qaniinyada cayayaanka

**AIDS waxaa lagaga hortaggi karaa:**

- Dhaqamada galmada badbaadada ah.
- Inaan lala wadaagin siriijka ama dhiiga/dheecaanada dhiiga dadka kale.
- Waxbarashadda.

Macluumaadka faahfaasan waxaa laga heli karaa Waaxda Caafimaadka Degmadda Northern Kentucky, Ka hortagga iyo Maaraynta HIV/AIDS, (859) 578-7660; Xarumaha Xakamaynta Cudurka bogga www.cdc.gov ama Waxda Xakamaynta Caabuqat, (859) 301-2155.

# BADBAADO KUGU ILAALINAYA

## BUKAANADA KA BAXAYA QAYBTA ASBAABO AAN CAAFIMAAD AHAYN

Si loo xaqiijiyo badbaadada bukaanadeena muddada dhigitaankooda xaga xarumaha St. Elizabeth Healthcare, St. Elizabeth waxay u baahan tahay in dhammaan bukaanadu joogaan qaybahooda muddada joogidooda.

**Bukaanada ka taga qaybtooda waxay gelayaan khataraha soo socda:**

- Suuragal ahaanshaha kordhaya ee shilalka iyo dhicitaanada, gaar ahaan haddii bukaanada looga baahan yahay inay qaataan IV ama qalab kale.
- Suuragal ahaanshaha kordhay ee daawaynta maqan, booqashooyinka dhakhtarka ama ballamaha cudur aqoonsashada.
- Ku guul daraysiga hoos baadhitaanka habboon ee dawada, kaas oo keeni kara khatarta, dhaawaca joogtada ah, ama dhimasho.
- Dhibaatada iyo daahida ku noqoshada qaybta xaalada halka gurmadka cusbitaalka lagu dhawaaqay. Tani gaar ahaan waa run iyaddoo ay caddahay walaacyada amniga kordhaya.
- Bukaanada tixgelin waaya xeerkan oo ka taga qaybahooda waxaa laga saari doonaa cusbitaalka.

Bukaanada looga fekero inay ka tageen talada caafimaadka (AMA) kuwaas oo markaas isku day inay ku soo noqdaan cusbitaalka waxaa lagu hagaajin doonaa Waaxda Gurmadka si loo baadho oo go'aan looga gaadho ku saabsan dib u dhigida cusbitaalka.

## MA JIRO SIGAAR QIIJIN AMA XEERKA ISTICMAALKA BUURIGA

Waa xeerka St. Elizabeth Healthcare inay bixiso deegaanka ugu wanaagsan si loo horumariyo heerka caafimaadka ee shaqaalahayaga, bukaanada, dhakhtarada, mutadawiciinta iyo booqdayaasha. Waxaa go'aan lagu gaadhay in cabida sigaarku caqabad ku yahay caafimaadka wanaagsan oo ay ku abuurto khataraha badbaadada suuragalka ah bukaanada, booqdayaasha, dhakhtarada, mutadawaciinta iyo shaqaalaha. Si loo siiyo jawi horumariya oo ilaaliya heerka caafimaadka shaqaalahayaga, bukaanada, booqdayaasha, dhakhtarada iyo mutadawiciitna, isticmaalka waxyaabaha buuriga, ay ku jiraan sigaarka korontada ah waa ka mamnuuc xaga xarumaha St. Elizabeth Healthcare, dhismayaasha ku xeeran iyo baabuurta, iyaddoo haddii la sheego, ay ku jiraan dhismaha la kiraystay (tusaale, Dhismaha La kiraystay xaga Edgewood, IS Building, Mt. Zion, iwm.).

Bukaanada xaga St. Elizabeth Hospice waxaa loo oggol yahay inay isticmaalaan waxyaabaha buuriga ah keliya aagaga loo oggol yahay iyo oggolaanshaha habboon.

Haddii aad xiisayanaso inaad iska daydo, waxaad la soo xidhiidhi kartaa dhakhartaaga wixii ah joojinta cabida sigaarka macluumaadka iyo fasalada, ama soo wac laynka iska daynta buuriga lambarka (800) QUIT NOW (1-800-784-8669).

## AMNIGA

St. Elizabeth Healthcare waxay haysaa shaqaalaha amniga xirfada leh xaga Covington, Dearborn, Edgewood, Florence, Ft. Thomas iyo Grant. Shaqaale tababaran ayaa ilaaliya 24 saacadood dhammaan. Shaqaalaha amniga waxay bixin karaan caawimada bukaanada/booqdayaasha leh samaynta baabuurka yar sida ka boodida baytariyo dhammaaday, soo celinta furayaasha lagu qufulay gudaha baabuurka iyo buuxinta taayirada naqasku ka dhiman yahay. Dhibaatooyinka kale ee baabuurta, Amnigu waxay ku farxi doonaan inay la xidhiidhaan xirfad yaqaanada caawimada baabuurta.

**Baabuurta aan ool Meesha aan la dhigin Baabuurta** - Haadadka aaga Dabka waxaa loo jari doonaa tigidh/waxaa jiidi doonaa masuuliyiinta booliska maxaliga ah.

Kaalmada Amniga marka la joogo St. Elizabeth Healthcare, garaac "0" ama soo wac (859) 301-2270. Hubku waa ka mamnuuc dhismaha cusbitaalka.

## KAAFATEERIYADA IYO ADEEGA IIBKA

Kaafateeriyada iyo/ama adeegyada iibka waxaa laga heli karaa qolka muhiim ah xaga Covington, goobta dhulka la siman Dearborn, Edgewood iyo Florence, iyo heerka muhiimka ah xaga Pt. Thomas. Saacadaha kaafateriyada hawsha waxaa ku jira:

**Dearborn**
6:30 - 8:30 Subaxnimo.
11 subaxnimo ilaa 1:30 galabnimo.
4:30 - 6 galabnimo.

Kaafateeriyadu waxay xidhan tahay dhammaadka todobaadka iyo fasaxyada. Mashiinada iibku waxay ku yaalaan gudaha kaafateeriyada, meel u dhow Chapel dabaqa koowaad, gudaha ED iyo Xarunta Ummulida.

**CentrePoint Cafe - Edgewood**
6 subaxnimo ilaa 7:30 habeenimo.
2 - 4 Subaxnimo.

**EastPoint Cafe - Ft. Thomas**
**WestPoint Cafe - Florence**
6:30 - 10 Subaxnimo.
11 subaxnimo ilaa 1:30 galabnimo.
1:30 - 3 p.m. (cuntooyinka fudud cabitaanada keliya)
4 - 6 galabnimo.

Liiska kaafateeriyada todobaadlaha ah waxaa la soo geliyay intaraanadka cusbitaalka iyo albaabada kaafateeriyada. Kanaalka Tiifiiga 46 waxa uu muujiyaa liisaska Edgewood.

**Grant**
Aagaga iibka waxay ku yaalaan qolka muhiimka ah iyo albaabka booqdaha bukaanka.

### Tareeyada Martida

Tareeyada martida waxaa loo heli karaa booqdayaasha bukaanka. Dalabyada waa in lagu dalbaa dalabka bukaanka oo waxaa lagu soo diri doonaa tarayga bukaanka.

Tareeyada cuntadda martiga waxaa laga heli karaa dhexda qolka Samaynta Cuntadda barnaamijka adeega. Codsiyada martida waxay ku xadidan yihiin ha taray bukaankiiba cuntadiiba. Kharashka yar ayaa lagu soo dalacaa, oo la siin karo Safiirada marka ay soo gudbiyaana. Jeeg, kaadhka kiridhitka ama lacag caddaan ah waa la oggol yahay. Soo wac qolka Samaynta Cuntadda adeega kordhinta liiska waafaqsan qaybta sare ee Cuntadaada.

## DUKAANKA HADYADA

St. Elizabeth Healthcare dukaanada hadiyada waxay ku yaalaan aagaga hoolka ee Dearborn, Edgewood, Florence, Ft. Cusbitaalada Thomas iyo Covington oo waxay bixiyaan hadiyado kala duwan, ubaxyo, jariidada iyo cuntooyin fudud. Xaga Grant, dukaanka hadyada bandhigiisa waxa uu ku yaala gudaha qolka sugida bukaan socodka. Salada hadiyada caadi ahaan waxay booqataa qolalka bukaanka dhammaadka todobaadyada xaga St. Elizabeth Edgewood. Dhammaan macaashyadu waxay u faa'iideeyaan adeegyada bukaanada xaga St. Elizabeth Healthcare.

**Saacadaha Dukaanada Hadiyada:**

**Dearborn**
Isniintay - Arbacada: 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo.
Khamiis: 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
Jimce: 9 subaxnimo ilaa 5 galabnimo.
Saacadaha dhammaadka todobaadka iyo fasaxyada xidhan.
(812) 496-7270

**Edgewood**
Isniinta - Jimce: 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
Sabti: 11 subaxnimo ilaa 8 galabnimo.
Axad: Duhurka ilaa 8 habeenimo.
(859) 301-2137

**Florence**
Isniinta - Jimce: 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
Sabti: Duhurka ilaa 4 galabnimo.
Axad: 1 - 5 galabnimo.
(859) 212-5202

**Ft. Thomas**
Isniinta - Jimce: 9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo.
Sabti: Duhurka ilaa 4 galabnimo.
Axad: 1 - 5 galabnimo.
(859) 572-3235

**Covington**
Isniinta - Jimce: 10 subaxnimo ilaa 3 galabnimo.




# BUUXINTA BAAHIYAHAAGA

## MAARAYNTA XANUUNKA

Ballan qaadkayagu waxa weeye adigu inaad hesho qaababka lagu caawiyo xanuun kaga si wanaagsan in loo xakameeyo muddada joogidaada.

Marka aanad si buuxda uga xor ahaan doonin xanuunka, hadafkayaga waa in la xakameeyo xanuunkaaga. Xanuunka sida wanaagsan loo xakameeyo waa uu kala duwan yahay qof kastaba. Si guul looga gaadho heerkaaga xakamaynta, waxaanu aqoonsan doonaa heerkaaga xanuunka la oggol yahay isticmaalka qiyaasaha xanuunka hoose.

Waxaanu ku ballan qaadaynaa caawimada inaad maarayso ama xakamayso xanuunkaaga. Si lagaaga caawiyo xanuunkaaga, waa inaan ku bilownaa wax ku saabsan waxa aan samayn doono maaraynta xanuunka iyo waxa aanu kaa filayno adiga, khabiirka xanuunkaaga. Daawooyinka xanuunka caadi ahaan waxaa loo dalbadaa qaabka sida loogu baahdo. Caadi ahaan lama qorsheeyo. Fadlan waydii dawooyinkaaga, sida loo baahdo, ama kala hadal qorshaha kalkaalisadaada wareegyada saacadaha ah.



# BUUXINTA BAAHIYAHAAGA

## Ballankayaga adigu waa

- Si looga ilaaliyo xanuunkaaga mid aad loo xakameeyo.
- Si loo bixiyo qaababka maaraynta xanuunka badbaadada ah.
- Si lagaaga warbixiyo xanuunka, xanuunka suuragalka iyo maaraynta qorshahaaga.
- Si loo aqbalo oo looga jawaabo warbixinahaaga xanuunka.
- Si loo waydiiyo haddii xanuunkaaga si wanaagsan loo xakameeyo oo loogu dhaqaaqo jawaabtaada.
- Si laguugu wargeliyo adiga saamaynta xun ee suuragalka ah ee maaraynta xanuunka.

## Ka reebidayada bukaanada

- La hadal dhakhtarkaaga iyo kalkaalisada ku saabsan xanuunkaaga.
- Si looga hadlo maaraynta xanuunkaaga filashooyinka dhakhtarkaaga iyo kalkaalisada.
- Si loo waydiiyo xanuunka dawada ama qiyaasaha xanuun baabiiyaha marka xanuunkaagu bilaabmo.
- Si loogu sheego dhakhtarkaaga ama kalkaalisada marka xanuunkaaga aan si wanaagsan loo xakamayn.
- Si looga hadlo su'aalahaaga ama walaacyada ku saabsan dawada xanuunka.



## Su'aalaha si loo waydiiyo kalkaalisada ama dhakhtarka

# ADEEGYADA TAAGEERADA

## DARYEELKA CAAWIMADA GAARKA AH

Waxaanu rumaysanahay in marka qofku uu ku jiro cusbitaalka, waa muhiim inaan keliya la siin daryeelka caafimaadka tayada leh, laakiin in la daryeelo dareenkooda iyo baahiyaha ruuxiga ah, sidoo kale. Marka lagu dhigo goobta, waxaa lagu waydiin doonaa haddii aad jeclaan lahayd wadaadkaaga diinta ama bulshadda caqiiqada diimeed in lagu wargeliyo in goobta lagu dhigay. Intaa waxa dheer, qofka diinaad ee ka socda cusbotaalka wixii ah taageero diimeed, la tashiga shakhsiga ah, akhriska kutubta ama tukashada. Inta badan way caawimo badan tahay in lagala hadlo qof diimeed waxa ku saabsan waxa aad la kulmayso. Dadka noo qaabilsan diimaha waxay u tababaran yihiin inay taageeraan dhammaan dadka, iyaddoon loo eegin caqiiqada ama diinta. Adeegan adiga ayaa laguu heli karaa, qoyskaaga iyo kuwa aad jeceshahay. Waydii kalkaalisadaada inaad la xidhiidho qof diimi ah ama soo wac:
(812) 496-7463 (Dearborn), (859) 301-2190 (Edgewood), (859) 572-3549 (Ft. Thomas), (859) 212-5216 (Florence), ama la xidhiidh xidhiidhiyaha telefoonka cusbitaalka (garaac "0").

**Bukaanada Kaatooliga:** Daily Holy Communion waxaa qaybiyay mutadawaciintayada Eucharistic Ministers. Haddii aanay ku arag mutadawiciinta ama kooxda diimeed oo waxaan jeclaan lahaa inaan helo Isku imaanshaha, fadlan waydii kalkaalisada si aad ula xidhiidho waaxda Daryeelka Qofka ee gaarka iyaddoo lagu metelayo.

**Edgewood:** Isku imaanshaha diimeed ayaa lagu bixiyaa macbadkayaga duhurka maalmaha todobaadka iyo 8:30 subaxnimada maalmaha barakaysan iyo Axadaha. Isku imaanshaha waxaa lagu muujiyay shabakada cusbitaalkayaga, Kanaalka 3.

**Ft. Thomas iyo Florence:** Adeegyada kullanka waxaa loo bixiyaa maalinle duhurka dhammaadka todobaaydda, gudaha macbadka cusbitaalka.

## MUTADAWICIINTA

Mutadawac ku shaqaynta xaga St. Elizabeth Healthcare waa ballan qaadka aan keliya caawin kuwa kale laakiin gaar ahaan ku abaal marinaysa sidoo kale. Xubin kasta oo kooxdayada mutadawaca ah waxay ku xamaasadaysan yihiin doorkooda samaynta faraqa wanaagsan ee martidayada iyo bukaanada.  In ka badan 1,280 mutadawiciinta da'aha 14-90+ waxay ka qayb qaataan wakhtigooda iyo kartiyaha, bixinta heerarka kala duwan ee adeegyada in ka badan 80 meelood oo ka duwan dhammaan nidaamka, samaynta tabarucadka hawl galka St. Elizabeth Healthcare. Haddii aad xiisaynayso barashada wax ku saabsan fursadaha mutadawaca ka dib markaas bogsato, fadlan soo wac Adeegyada Mutadawaca (859) 301-2140 ama nagu soo booqo stelizabeth.com/volunteer.

## PRIMEWISE - KU XIDHAYSA DADKA WAA WAYN 50+ CAAFIMAAD IYO FAYO QAB

Dadka waa wayn 50 ama ka wayn waxaa lagu marti qaadaa inay ka faa'iidaystaan xubinimada bilaashka ah gudaha PrimeWise. Barnaamijkan waxa uu bixiyaa kaalmada caymiska iyo su'aalaha Medicare, barnaamijyada waxbarashadda caafimaadka, bilaash iyo kharashka hoose ee baadhitaanka caafimaadka, macluumaadka iyo gudbinta labbadaba St. Elizabeth Healthcare iyo adeegyada bulshadda, kooxaha taageerada daryeelaha, fasalada jimicsiga bilaashka ah ee debecsan, diiwaanka lacag dhimista, nootaayo bilaash ah iyo wax kale oo badan. Xubnaha PrimeWise ee cusbitaalka la dhigayee ku wargeliya xubinimada PrimeWise kooda marka la dhigay, waxay helaan mid bilaash ah OO waydiiyaha Kentucky oo loogu soo diro qolkooda bukaan socodka xaga Edgewood, Florence, iyo Ft. Thomas waxaa raacay dheefaha VIP maalinta koowaad. Dirida keliya waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha. Macluumaadka dheeraadka ah ama inaad ku biirto, soo wac xafiiska PrimeWise lambarka (859) 301-5999 ama booqo stelizabeth.com/primewise.

## MAARAYNTA SONKORTA

Barnaamijka Bukaan socodka Is maaraynta Cudurka Sonkorta waxa uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan cuntadda, guluukoosta dhiiga ka warhaynta iyo qaybaha kale ee muhiimka ah ee daryeelka cudurka sonkorta. Bukaanada waxaa loo arkaa sidii shakhsiyaadka ama kooxda fasalka. Ballamaha waxaa lagu heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha xaga Xarunta Cudurka sonkorta Goboleed ee Covington gudbinta dhakhtarka. Macluumaadka dheeraadka ah si loo qorsheeyo ballan, soo wac (859) 655-8910.

## XARUNTA KALKAALISKA XIRFADA LEH

St. Elizabeth Xarumaha Kalkaalisada Xirfada leh waxay ku yaalaan Florence iyo Ft. Thomas. Shaqaalaha Xarunta Kalkaaliska Xirfada leh waxay bixiyaan daryeel dhaafsiisan joogida hore ee cusbitaalka ee daryeelka dheeraadka ah ama ka bogsashada jirada. Kooxahayaga kalkaalisku waxay ku takhasuseen daryeelka dadka waa wayn, daryeelida iyo daryeelka soo kabashada ah. Macluumaadka dheeraadka ah, fadlan waydii si aad ula hadasho Isku duwaha Daryeelka iyo/ama Shaqaalaha Bulshadda qaybtaada.

## DARYEELKA CAAFIMAADKA GURIGA

St. Elizabeth Healthcare waxay bixisaa adeegyada daryeelka guriga dhexda Wakaalada Daryeelka Guriga ee St. Elizabeth. Barnaamijku waxa uu keeni karaa tiro adeegyada caafimaadka toos ilaa gurigaaga, ay ku jiraan daryeelka kalkaaliska, faleebada xididka laga qaato, daryeelka gaarka ah, saaxiibada, caawimada nolosha maalinlaha ah iyo heerka buuxa ee adeegyada daawaynta. Macluumaadka dheeraadka ah, iyo inaad la hadasho Isku duwaha Daryeelka iyo/ama Shaqaalaha bulshadda Qaybtaada.

# ADEEGYADA TAAGEERADA

## ADEEGYADA FARMASIIGA

Iyaddoo u habboon bukaanada gudaha dawo qorida cusbitaalka la qoray dirida waxaa lagu biixin karaa dhexda Farmasiiga Medical Village. Farmasiigu waxa uu u furan yahay bulshadda oo waxa uu ku yaalaa dabaqa saddexaad ee Dhismaha Dhakhtarada xaga 20 Medical Village Drive gudaha Edgewood. Saacadaha hawlgalka waa maalmaha todobaadka, 7:30 subaxnimo ilaa 6 fiidnimo iyo Sabtida 9 subaxnimo ilaa 1 duhurnimo.

Farmasiiga Medical Village waxa uu aqbalaa lacagta caddaanka ah iyo kaadhadhka dawo qorida kooxda saddexaad.

## BARNAAMIKA SOO DIRIDA DAWADA

Farmasiiga St. Elizabeth Medical Village sidoo kale waxa uu bixiiyaa barnaamijka Dirada Dawada Ka bixida (DMD) xaga St. Elizabeth Edgewood. Adeegan waxa uu siiyaa bukaanka fursada lagu buuxiyo dawooyinkooda oo loogu soo diro iyaga qolkooda ka hor inta aanay ka bixin cusbitaalka.

Bukaanada u qalma waxaa ka mid ah kuwan tegaya guriga ama adeegsanaya Adeegyada Caafimaadka Guriga. Bukaanadu waxay ku wargelin karaan shaqaalaha dantooda.

Marka shaqaalaha DMD uu ogsoonaado danta bulaanka, waxay u diiwaan geliyaan bukaanka adeega. Shaqaalaha DMD markaa waxay u soo diri doonaan dawo qorida bukaanka. Diridu waxay dhacdaa 10 subaxnimo ilaa 4 galabnimo. Dawo qorida waa in la helaa 2 maalinimo isla maalinta la soo diro.

Barnaamijkan waxaa hadda laga heli karaa xaga St. Elizabeth Edgewood. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walacyo ah, fadlan waydii kalkaalisadaada.

## ADEEGYADA DEEGAANKA

Waxaanu doonaynaa qolkaaga iyo xamaamkaaga inuu nadiif yahay oo raaxo leeyahay dhammaan joogitaankaaga aad nala joogto. Maalin kasta waxaanu bixin doonaa Nadaafada Maalinlaha ah, oo ay ku jiraan ka saarida qashinka, nadiifinta iyo nadiifinta sinixiga, tuushka iyo musqusha gudaha xamaamkaaga, oo boodhka ka tuma oo qoyaan ku masaxaa qolkaaga iyo sagxadaha xamaamka.

Si loo hubiyo raaxadaada iyo in la ilaaliyo deegaankayaga, waxaanu beddeli doonaa go;yaashaada sariirta sida loogu baahdo ama marka la codsado haddii aad u baahan tahay adeegyada guri hagaajinta dheeraadka ah, fadlan soo wac 1-2230 oo xubin ka mid ah shaqaalahayaga ayaa ka jawaabi doonta codsigaaga sida ugu degdega badan ee suuragalka ah (xaga Dearborn, fadlan soo wac 67472).

## DARYEELKA XANUUNKA DADKA KU RAAGA

Daryeelka xanuunka dadka ku raaga, ama daryeelka, waa adeega la talinta dheeraadka ah ee loo heli karo bukaanka St. Elizabeth Healthcare ee qaba cudurka socda. Daryeelka xanuunka dadka ku raaga waxa uu xooga saaraa bixinta midka jidh ahaan, dareen ahaan iyo raaxada ruuxiga ah ee bukaanka. Waaxdu waxay la shaqaysaa dhakhtarka bukaanka wixii ah maaraynta xanuunka iyo maamulka astaamaha kale ee dhibta leh. Si loo buuxiyo waaxda Daryeelka xanuunka dadka ku raaga, waxaad u baahan tahay dalabka dhakhtarka/Haddii aad xiisaynayso u gudbinta daryeelka xanuunka dadka ku raaga, fadlan la hadalka dhakhtarkaaga.

## GOOBT XANAANAYTA

Goobta daryeelku waxay daryeelyaasha bukaanada ku jira wejigii u dambeeyay ee cudurka aan la dawayn karin sida kansarka, cudurka wadnaha, faaliga ama cudurka ilowga. Goobta daryeelku waxay dawaysaa dadka, beddelka cudurada. Shaqaalaha goobta daryeelka waxya xooga saartaa tayada nolosha, halkii ay ka ahaan lahayd cimri dhererka nolosha, iyaddoo maaraynaysa xanuunka iyo astaamaha kale, markaas bukaanada waxay ku qaadan karaan maalmahooda u dambeeya si sharaf leh gudaha guryahooda, marka ay suuragal tahay.

Waxaanu bixinaa labbada daryeelka gudaha guriga., siiba daryeelka gudaha qaybta bukaan socodka. Kalkaalisooyinku waxay sameeyaan booqashooyinka guryahooda oo waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii si looga jawaabo gurmadyada. Waxay sidoo kale baraan daryeelayaasha sida loo maareeyo xanuunka iyo astaamaha kale. Dhigida barnaamijka Daryeelka ah waxa uu uga baahan yahay bukaanku inuu haysto lix bilood ama in ka yar oo uu noolaanayo oo aanu in dheeraad ah qaadanayn daryeelka yaraynta xanuunka. Macluumaadka dheeraadka ah, fadlan soo wac (859) 301-4600.



## DARDAARANKA HORE LOO SII QORO, DARDAARANKA QOFKA NOOL QORAAYO IYO WAKIILASHADA QOF KALE

Dardaaranka hore loo sii qoraa wax dhokumenti sharci ah oo sheegaysa, qoraa ahaan, tilmaamaha qofka wayn ee ku saabsan daryeelkiis ama keeda cafimaadka. Sidoo kale waxay magacaabi kartaa qof inuu u sameeyo doorashooyinka caafimaad qofkaas, haddii isaga ama iyaddu uu awoodi waayo inuu gaadho go'aamada ku saabsan daryeelka caafimaadka. Si waafaqsan sharciga federalaka iyo gobolka, qof kasta oo wayn oo helaya daryeelka bukaan jiifka ama doorto daryeelka bukaan socodku waxaa la waydiin doonaa wakhtiga nidaamka cusbitaal dhigida haddii dardaaranka hore loo sii qoray la sameeyay. Waa la ma huraan dardaaranka hore, fadlan soo qaado dhokumentiga markaas koobiga waa la samayn karaa oo waxaa lagu lifaaqi karaa diiwaankaaga caafimaadka. Waa lama huraan in la keeno dhokumentigan wakhti kasta oo lagu dhigo cusbitaal maadaamada aanay qayb joogta ah oo diiwaankaaga ah noqon. Haddii aanad haysan dardaaranka hore, macluumaadka khuseeya xaqaaga aad ku gaadho go'aamada daryeelka caafimaadka waafaqsan sharciga Kentucky ama Indiana waxaa lagu siin doonaa wakhtiga cubsitaal dhigida.

St. Elizabeth Healthcare waxa uu u hogaansami doonaa dardaaranka hore iyaddoo tilmaamahan ay ku xad gudbnaan sharciga ama mooralka, diinta ama heerarka anshaxa nidaamkayaga mooyaane. Koobiga heerarkan, La xidhiidh daryeelka Caawimada garka ah oo waydiid Tilmaamaha Anshaxa iyo Diimeed ee Xarumaha Catholic Healthcare. Guud ahaan, heerarkan waxay oggolaadaan bukaanka ama bukaanka sharci ahaan wakiilka la oggol yahay hakinta ma ka noqoshada daawayna nolosha waarisa keliya haddii bukaanku gaadhay marxalada faa'iido la'aanta caafimaadka iyo haddii culayska daawaynta bukaanku ay ka miisaan badan lahayd dheefta. Daryeelka raaxada leh iyo xanuun baabiinta had iyo jeer waa la bixiyaa. Ka sakow heerarka ku habboon dhammaan xarumaha daryeelka caafimaadka, St. Elizabeth Healthcare waxaa haga Tilmaamaha anshaxa Iyo diimeed ee Xarumaha Daryeelka Caafimaadka. Waxaa degdeg laguugu wargelin doonaa haddii St. Elizabeth aanay u hogaansami karin tilmaamaha lagu bixiyay dardaaranka hore ama wakiilkaaga daryeelka caafimaadka. Dhacdadan, adiga ama wakiiladaada la oggol yahay waxay xaq u leeyihiin ay ku codsadaan in laguu wareejiyo cusbitaalka ee u hogaansanaan lahaa tilmaamaha iyo St. Elizabeth waxay ka caawin doontaa wareejinta.

Dadka iska jira, si kastaba ha ahaatee, waxaa jiri kara daryeelka caafimaadka aad codsatay gudaha dardaarankaaga kaas oo St. Elizabeth Healthcare ama dhakhtarkaaga(tarada) ay diidi karaan oo lagu oggol yahay sharciga gobolka. Tan waxaa ka mid ahaan kara, laakiin kuma xadidna, daryeelka uurka la xidhiidha iyo daawaynta, ka noqoshada qiyaasaha qaar daawaynta nolosha taageerada, daawaynta qaar nolosha badbaadiisa, iwm. Dhacdada miduun St. Elizabeth Healthcare, hal ka mid ah wakaaladaheeda ama barnaamijyada, ama dhakhtarkaaga haysto diidmada wacyiga gaarka ah iyo aan u diyaar ahayn inuu adiga ku siiyo daryeelka caafimaadka la hago, cusbitaalka ama wakaalada ama barnaamijka la xidhiidha, gudaha awoodahiisa, waxay ka caawin doontaa dhakhtarkaaga inuu kuu wareejiyo adeeg bixiyaha daryeelka cafimaadka diyaarka u ah inuu ku daryeelo. Isku wakhti, ilaa lagu wareejiyo, cusbitaalka ama barnaamijka ama wakaalada waxay caawin doontaa dhakhtarkaaga inuu qaado tallaabooyinka macquulka si uu kuu siiyo daryeelka la hago. St. Elizabeth ma diidi doonto inay siiyaan daryeelka caafimaadka qof kasta ama haddii kale la takooro qof kasta sababtoo ah qofka muu saxeexin dardaaranka hore. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ama talo ku saabsan dardaaranka hore, fadlan la xidhiidh qareenkaaga.

Florence iyo Ft. Goobaha Thomas waxay bixiyaan filim muujinaya dardaaranka hore ee Kanaalka 3, kanaalka macluumaadka bukaanka, saacadle, iyo rubuc ilaa saacad iyo rubuc ka dib saacada. Xaga Dearborn, waxaad soo waci kartaa waaxda Maamulka Macluumaadka Caafimaadka lambarka (812) 496-7350 si loo codsado macluumaadak Dardaaranka Hore ka hor cusbitaal dhigidaada. Xaga Edgewood, waxaad soo waci kartaa xafiiska PrimeWise (859) 301-5999, ama la hadal shaqaalaha bulshadda si aad u hesho xidhmada Dardaaranka hore oo su'aalahaaga halaga jawaabo.

Haddii aad hayso walaac ama cabasha ku saabsan dardaaranka hore, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad ula wadaagto tan si toos ah kuwa bixinaya daryeelka ama adeegyada wax la iska waydiinayo ama la xidhiidh maareeyaha waaxda si toos ah. Haddii aanad rumaysanyn maareeyaha waaxda inuu si ku filan uga hadlay walaacaaga, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad la xidhiidho waaxda Xidhiidhada Bukaanka lambarka (859) 301-5581. St. Elizabeth Healthcare waxay ku ballan qaadaysaa xalinta walaacyadaada ku saabsan shuruudaha dardaaranka hore wakhti habboon.

Si kastaba ha ahaatee, haddii walaacyadaada aan laga xalin waaxda ku lugta leh ama waaxdayada Xidhiidhada Bukaanka, markaa waad ka warbixin kartaa walaacaaga ama ka diiwaan geli cabasho meesha soo socota:

**Xafiiska Guddida Wada jirka ah ee Ka warhaynta tayada**

Telefoonka: 1 (800) 994-6610
Iimaylka: complaint@jointcommission.org

**Qaybta Kentucky ee Xarumaha iyo Adeegyada daryeelka Caafimaadka**

Office of the Inspector General
P.O. Box #12250, Lexington, KY 40582-2250
Telefoonka: (859) 246-2301

**Guddida Aqoonsiga Daryeelka Cafimaadka (Accreditation Commission for Healthcare)**

Telefoonka: (855) 937-2242, Iimeylka: complaints@achc.org

**Indiana Department of Health**

2 N. Meridian Street, Indianapolis, IN 46204
Telefoonka: (800) 246-8909

## TAAGEERADA IYO DARYEELKA DHAMMAADKA NOLOSHA

Marka adiga ama kuwa ehelkaaga ah ee aadka u jiran la keeno cusbitaalka, filashadaada waa in bukaanu ay ku noqon doonaa guriga ama loo gudbin doono barnaamijka daryeelka ballaadhan. Haddii aanay tani dhici karin, qaybo go'aamada ah waxay u baahan karaan in la gaadho. Ka hor ka fekerka waxay yihiin doorashooyinkaaga, waa

inaad ogsoonaataa qaybo ka mid ah xaqiijinta iyo falsafada daryeelka St. Elizabeth. St. Elizabeth Healthcare waxay ku ballan qaadaysaa sare u qaadid wayn oo caafimaadka ah iyo siinta bulshadda daryeelka caafimaadka. Dedaal kasta ayaa kooxda daryeelka caafimaadku samaysaa si ay u dawayso oo u daryeesho qofka jiran iyo dhaawaca ah. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha iyo rabintaanada bukaanada jirada aan laga kicin qaba waa walaacayaga u badan marka la eegayo ilaa xadka daawaynta.

### Sidaas awgeed, shuruudaha qaar waxay u baahan yihiin caddayn dheeraad ah, lo sharaxo sida soo socda.

**Qeexida erayada inta badan la isticmaalo:**

- **CRP soo celinta neefshada caadiga ah ka dib wadna xanuunka CPR)**: Nidaamka gurmadka ah ee ka kooban neefsahada ardafiishalka ah iyo cadaadiska labbada ah ee xabadka, la sameeyo si la isugu dayo soo kicinta bukaan uu wadnahu istaagay ama neefsahada joojiyay.
- **Summada**: Hareeraha kooxda dhakhtarada gaarka ah, kalkaalisooyinka, iyo farsamayaqaanada bilaaba CPR.
- **Miyirka ha soo Celin (DNR) Rabitaanada (DNR)**: Dalabka uu qoro dhakhtarka araya shaqaalaha inaanay bilaabin CPR haddii bukaanku joojiyo neefsashada ama wadnahiisu istaago.
- **Qorshaha Daawaynta DNR**: Dhokumentiga loo isticmaalo wada xidhiidha kooxda daryeelka caafimaadka rabitaankaaga ku saabsan soo kicinta qofka naqasku ku dhego.
- **Taageerada nolosha**: Daawaynta caafimaadka ama nidaamyada loogu talo galay in qofka la soo kiciyo, dib u soo miyirsado, ama la beddelo shaqooyinka jidhka muhiimka ah.
- **Qofka jirada aan laga kicin qaba**: Bukaanka aan la dawayn karin ama dhimashada u dhow.

Go'aankan adiga (haddi aad awoodo) ama ehelkaaga iyo dhakhtarku u baahdo inuu tan sameeyo: haddii, iyaddoo ay sababta sifada jirada, adiga iyo ehelkaagu aydaan qabin rajada bogsashada, haddii si aad ah laguu daweeyo, iyaddoo la isku deyayo in miyir kaagii lagugu soo celiyo haddii wadnahaaga ama neefsashadaadu istaagto; ama lagaa dhigo mid raaxo badan sida suuragalka ah oo laguu oggolaado inaad dhimato. Dakhtarada,kalkaalisooyinka, wadaada, iyo shaqaalaha bulshadda waxaa la heli karaa si kaala hadlaan go'aamadan, Fadlan fahan inaanu jirin dalabka aan lambarka lahayn oo dib loo celin karo marka aad codsato, iyo marka dalabka aan lambarka lahayn la codsaday waxaad sii wadi doontaa helida daryeelka dhow iyo daryeelka kalkaaliska fiican si loo xaqiijiyo raaxo. Sidoo kale, haddii ay jiraan tusaalooyinka aad rabto inuu CPR ku sameeyo laakiin duruufaha kale oo aanad rabin inaad haysato CPR, kuwan waa in lagala hadlaa dhakhtaradaada oo lagu caddeeyay Qorshaha Daawaynta DNR. Waxaanu garanaynaa inay kuwan yihiin go'aano adag in la gaadho oo ay u baahan yihiin fikir, raadinta ruuxda, iyo taageero, siiba falan qaynta lala sameeyo kooxda daryeelka caafimaadka iyo kuwa ehelkaaga ah. Shaqaalaha St. Elizabeth waxay halka u joogaan si ay kuu caawiyaan oo kuu taageeraan adiga iyo qoyskaaha iyo saaxiibada dhexda qaybta adag ee cusbitaal dhigida.

## KU DEEQIDA XUBINTA JIDHKA

Wajahida dhammaadka nolosha way adkaan kartaa oo waxay noqon kartaa wakhti naxdin badan. Qoysaska waxaa la waydiinayaa inay go'aan ka gaadhaan xubin ku deeqida wakhtigan murugada leh. Kuwan rabitaankooda sheegay ku saabsan ku deeqida xubin jidhka mar hore waxay ku bixiyaan tallaabada raaxada leh ee ehelkooda gudaha go'aankaas. Fadlan kala hadal qoyskaaga ama qor haddii aad doonayso inaad ku deeqdo xubin jidhka ah. Markaad gaadho go'aankan, fadlan ka feker xaqiiqooyinka soo socda:

- Ku deeqida dahaadhka indhahaaga (daboolka cad ee saaran indhahaaga) ayaa soo celin kara aragtida qof indhabeelay.
- Ku deeqida maqaarkaaga (laga jaray aaga aan muuqa) waxa uu soo celin karaa muuqaalka qofka dhibanaha ah ee gubtay.
- Ku deeqida gudaha lafta dhegta waxay soo celin kartaa maqalka qof dhega la'.
- Ku deeqida xubnaha muhiimka ah, sida kelyaha, beerka iyo wadnaha waxay badbaadin kartaa nolol.

Fadlan ka feker calaamadinta kaadhka deeq bixiyaha iyo kala hadalka qoyskaaga wixii ah rabitaankaaga.



## ERAYDA DARYEELKA CAAFIMAADKA IYO ERAYDA LA SOO GAABIYO

- **Kalkaalisada Masuulka ah/Isku duwaha Caafimaadka -** Xirfad yaqaanka ka masuulka xiliga shaqada la siiyo.
- **CICU -** Qaybta Daryeelka Xoogan ee Wadnaha ah.
- **CSR -** Bogsashada Qaliinka Wadnaha.
- **CNA -** Kaaliyaha Kalkaalisda La ansixiyay; xirfad yaqaan bixiya daryeelka gaarka ah ee aasaasiga ah hoosta kormeerka kalkaalisada.
- **Hep Lock -** Laynka IV ku hadha gacanta bukaanka, laakiin looga furo daboolka isticmaalka sida loogu baahdo.
- **Hospitalist (Dhakhtarka cusbitaalka) -** Dhakhtarka ku takhasusay daryeelka bukaanda cusbitaalka la dhigo aan lahayn dhakhtarad daryeelka koowaad ama kuwa dhakhtarkooda daryeelka koowaad uu ku wareejiyay daryeelkoda dhakhtarka cusbitaalka muddada joogidooda.
- **ICU -** Qaybta Daryeelka Xoogan.
- **I&O -** Qaadshada iyo soo saarida; waxay tixraacaa qiyaasta dareeraha gala iyo ka baxa jidhka bukaanka.
- **LPN -** Kalkaalisada Ruqsada haysata; xirfad yaqaan ka hoos shaqaysa kormeerka guud ee Kalkaalisada Diiwaanka Gashan.
- **NP -** Kalkaalisada Xirfada leh; kalkaaliso sare oo ka soos shaqaysa dhakhtarka bixiya daryeelka bukaanada la gaar yeelay.
- **NPO -** Ma jiro shay afka ah, ma jiro wax la cuno oo la cabo.
- **PA -** Kaalmada Dhakhtarka; u sheega dhakhtarka.
- **PACU -** Qaybta suuxdinta Ka dib sido kale loo yaqaano Qolka Bogsashada.
- **PCA bamka/PCA mashiinka -** A qalabka lagu xidho laynka IV ee gudbiya xanuunka dawada miduun qaab joogto ah ama riixida batanka, iyadodo ku xidhan setinka.
- **Laynka PICC -** IV La gaar yeelay.
- **PRN -** Soo gaabinta macnaheedu yahay "sida loo baahan yahay." Dhakhtaro badan waxay dalbadaan dawada xanuunka iyo dawo kale oo ah "qaabka PRN," oo macnaheedu yahay inaanay tani u qorshaysnayn in la siiyo wax wakhti gaara ah, laakiin marka la codsado (tusaale, lix saacadood oo kasta PRN).
- **TCU -** Qaybta Telemetry/Transitional Care Unit; ee bukaanada ka warhaynta wadnaha.

# MACLUUMAAKDA DHAQAALAHA

## OGGOLAANSHAHA/KA HOR OGGOLAANSHAHA

Badanka xeerarka caymiska caafimaadku waxay u baahan yihiin adeegyada bukaan socodka iyo bukaan jiifka la doorto si dib loogu eego oo hore loo sii oggolaado baahida caafimaadka. Qaybtayada la talinta caymisku waxay la shaqaysaa dhakhtarkaaga gaarka ah shaqaalahiisa ama keeda cusbitaalka iyo shirkada caymiska si loo buuxiyo shuruudahan. Caawimadaada ayaa loo baahan yahay in la siiyo cusbitaalka macluumaadka caymiska dhammayska tiran ee u dambeeyay si loo xaqiijiyo sheegashadaada in loo habbeeyo si sax ah iyo wakhti habboon. Maadaama qorshayaasha qaarkooda ay u baahan yihiin wargelinta tooska ah ee ka timid adeegyada cusbitaalka. Waa muhiim in la aqoonsado xeerarka xaaladaha ku gedaaman iyo shuruudaha. Macluumaadka dheeraadka ah ama caddaynta dheeraadka ah waxaa laga heli karaa iyaddoo la soo wacayo waaxda adeega macmiilka qorshaha caymiska, ee ku qoran kaadhkaaga caymiska.

## KHARASHYADA ADEEGA

St. Elizabeth Healthcare waxay ku balan qaaday bixinta daryeelka ku habboon qaab kharashku hooseeyo. Waxaa lagugu soo dalaci doonaa sheeyada garka ah iyo adeegyada muddada joogidaada cusbitaalka. Qolkaaga maalinlaha ah iyo kharashka jiifka waa daryeelka kalkaaliska 24 saacadood ah, adeegyada diiwaanka caafimaadka, iyo adeegyada taageerada sida guri hagaajinta, dhar maydhka iyo dayactirka dhismaha. Waxaad sidoo kale wajahi doontaa kharashyada adeegyada kale ee uu dalbado dhakhtarkaagu oo uu bixiyo cusbitaalkaagu. Adeegyadan waxaa ka mid ah baadhitaanada shaybaadha, raajooyinka, dawada, istimaalka qolka qaliinka, daawaynta jidhka, adeegyada daryeelka neefsashada, qalabka, iwm. Waxaad heli doontaa biil gooni ah oo kharashyada xirfad yaqaanka ah oo ka timid dhakhtarka gaarka ah iyo dhakhtarada kale ee madaxa banaan ee la xidhiidha daryeelkaaga. Tusaalooyinka waxaa ku jira khabiirka raajada akhriya filimka raajadaada, dhakhtarka qaliinka iyo dhakhtarka suuxinta sameeya qaliinkaaga, ama dhakhtarka wadnaha loogu yeedho la talinta. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo khuseeya biilashan dhakhtarka, fadlan soo lambarka telefoonka ku qoran biilashaas.

## BIIL BIXINTA IYO LA TALINTA MAALIYADA

Caymiska daryeelka cafimaadku maanta wuu adkaan karaa oo wareer noqon karaa. St. Elizabeth Healthcare sidoo kale waxay aqoonsan tahay culayska dhaqaalaka gaarka ah ee bukaanada ee caymiska xadidan ama kuwa aan lahayn caymiska daryeelka caafimaadka. Ka dib marka lagu dhigo cusbitaalka, waxaanu qiyaasi doonaa inta ay leegtahay caymiskaaga dabooli doona iyo inta ay tahay ee lagaa filan doono inaad ka bixiso kootadaada. La taliyayaashayada maaliyada ayaa u jooga shaqaalahu si ay kaagala hadlaan qaban qaabada lacag bixinta adiga ama qofka masuulka ka ah biilkaaga.

La taliyayaasha maaliyada sidoo kale waxay caawiyaan bukaanadu inay sii wataan daboolidooda caymiska dhexda COBRA, Naafanimada, Medicaid, lagu maalgeliyo dhexda barnaamijyada gobolka ee daryeelka dadka bilaa caymiska ah, deeq, iwm.

Tusaalooyinka qaarkood, la taliyaha maaliyada awood uma yeelan karo inuu kula kulmo adiga ka hor ka bixitaada cusbitaalka. Haddii tani tahay xaalada, waxaad ku heli doontaa biilka xaga guriga. Fadlan ku wargeli kalkaalisadaada haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaacyo ku saabsan biilkaaga oo aad doonayso inaad la hadasho la taliyaha dhaqaalaha.

**La taliyayaashan waxaa lagala soo xidhiidh karaa iyaddoo la soo wacayo lambarada soo socda:**

Covington: (859) 655-4859

Dearborn: (812) 496-7325

Edgewood: (859) 301-9090

Florence: (859) 212-5244

Ft. Thomas: (859) 572-3418

Grant: (859) 824-8130

Waxaanu biilka u diri doonaa shirkadaada caymiska. Si kastaba ha ahaatee, waxaad kama dambaysta ka masuul tahay kharashyada lagalo booqashadaada cusbitaalka. Marmarka qaar kuwa magacoodu ku jiro caymkska waa inay ka qayb qaataan dejinta kooxda shirkadaha caymiska. Waxaad biil laguugu soo diri doonaa adeegyo kasta oo aan la daboolin, ama qadarka aanu bixin shirkadaada caymisku. Waxaad la xidhiidhi kartaa adeegyada biil bixinta xaga St. Elizabeth Healthcare addoo soo wacata (859) 655-4100.

**Cinwaanka boostadu waa:**

1 Medical Village Dr.
Edgewood KY, 41017

St. Elizabeth Healthcare waxay ku tiirsan tahay lacag bixinta bukaanada ka timid iyo kooxaha saddexaad ee buuxiya kharashyada oo sii wada inay adeega adiga iyo bulshadda siiyaan. Ku dhaqanka xeerarka soo socda waxay kaa caawin doonaan adiga inuu dejiso biilkaaga si degdega ah oo waxay awood noo siiyaan inaan kaa caawino helida dhammaan dheefaha caymiska aad xaqa u leedahay.

# MACLUUMAAKDA DHAQAALAHA

## CAYMISKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

St. Elizabeth Healthcare waxay aqoonsan yihiin labbadaba xeerarka caymiska caafimaaka shakhsiga iyo kooxda, ay ku jiraan Medicare, Medicaid, Blue Cross iyo qorshayaasha kale ee caymiska ee ganacsiga ah. Xataa in kastoo aad lahaan karto caymiska caafimaadka ballaadhan, waxaad ugu dambaynta ka masuul ahaan kartaa lacag bixinta biilkaaga. Kharashyo kasta aanu daboolin xeerkaaga ama kharashyo kasta shirkadaada caymiska ma bixiso gudaha 45 maalmood waxa ay noqon kartaa masuuliyadaada. Sidoo kale waxaad ka masuul tahay lacag bixinta haddii caymiskaaga aan la xaqiijin karin ka hor inta aan cusbitaalka lagaa saarin. Ka dib marka lagaa saaro cusbitaalka biilka u dambeeya ayaa laguu soo diri doonaa adiga i yo shirkadaada caymiska.

## HADYADA

Shaqaalaha ama kooxaha ma aqbali karaan hadiyadaha ama lacagta in la siiyo. Waxaan qiri karnaa ku wanaagsanaantooda shaqada, naxariista ama dedaalka dheeraadka ah qaababka soo socda:

- CareGrams, foomka shaqaalaha iyo aqoonsashada kooxda, waxaa laga heli karaa xarumahayaga ama onlayn bogga stelizabeth.com/caregram.
- Warqaddaha gaarka ah ee ku socda maamulka cusbitaalka oo loo dirayo: Waaxda Wanaagsanaanta Caymiska c/o St. Elizabeth Healthcare Administration, 4900 Houston Road, Florence, KY 41042.
- Qirida shakhsiyaadka muhiimka ah ama waaxaha waxaad la ogaan karaa marka la buuxinayo xog ururinta ka dambaysa ka bixida cusbitaalka.
- Foomamka waxaa sidoo kale laga heli karaa qaybaha kalkaaliska ee magacaabida kalkaalisada Daisy Award oo la siiyo keliya kalkaalisooyinka adeegyada gaarka ah.
- Badanka wakhtiyada, bukaanada iyo xubnaha qoysasku waxay ugu muujiyaan mahad naqooda dhakhtarada, kalkaalisooyinka iyo daryeelayaasha kale deeq. Hadiyada St. Elizabeth Foundation waxay kuu oggolaataa inaad qadarin gaar ah siiso xirfad yaqaanada daryeelka caafimaadka marka sare loo qaadayo daryeelka bukaanada kale xaga St. Elizabeth. Daryeelahu waxa uu ka heli doonaa aqoonsi oo waxaa lagu wargelin doonaa tabarucaadka lagu sharfayo iyaga (qadar hadyad ah oo qarsoodi ah). Deeqaha waxaa lagu samayn karaa onlayn bogga stelizabeth.com/foundation ama waxaa loogu soo diraa boostada: St. Elizabeth Foundation, 1 Medical Village Drive, Edgewood, KY 41017.
- Lacag cadaan ah/jeegag la siiyo lacagta kalkaaliska lagu maalegliyo magaca shaqaalaha ama qayn aad doonayso inaad aqoonsato. Shaqaalaha/qayb ayaa heli doonta mahadanqa aqoonsiga.
- Lacag cadaan ah/jeegag la siiyo Elizabeth Foundation magaca shaqaalaha ama qayn aad doonayso inaad aqoonsato . Shaqaalaha/qayb(aha) waxay heli doonaan mahadnaqa aqoonsiga.

## AASAASKA/TABARUCAADYADA

St. Elizabeth Foundation waa biriishka u dhexeeya St. Elizabeth iyo bulshadda. Ixsaan falka waxa uu u oggolaadaa St. Elizabeth Healthcare inay u gudbiyaan daryeelka ugu tayada sareeya bulshadda, oo ay taageero siiyan bukaanada iyo qoysaskooda. Hadiyadaha xuska ama sharafeed ayaa laga dhigi karaa sidii qadarintii u dambaysay ee qof khaas u ahaa noloshaada. Dhammaan deeqaha ku socda St. Elizabeth waxaa laga jarayaa cashuurta. Macluumaadka dheeraadka ah, la xidhiidh xafiiska Mu'asasada lambarka (859) 301-3920.

## BOGSIIYAYASHA DHEXDAYDA BARNAAMIJKA BUKAANKA

Bogsiiyayaasha Dhexdayada barnaamijka waa marti qaadka lagu muujinayo mahadnaqa iyo sharfida shaqaalaha iyo daryeelayaasha qaab gaar ah. Haddii ay tani tahay qoraalka wadna taabashada leh, ama hadiyad maaliyadeed si loo taageero daryeelka nolol siinta St. Elizabeth Healthcare ay bixiso maalin kasta. Adiga ama xubin qoyskaaga ah yaa buuxin karta warsidaha Bogsiiyayasha Dhexdayada ah, oo siinaya shaqaale si uu ugu soo noqdo Mu'asasada, ama waxaad dib boosta ugu diri kartaa Mu'asadada ka dib. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa adeeg bixiyaha St. Elizabeth Healthcare si uu ugu gudbiyo ilaa EPOC Mu'asasada si loo sharfo shaqaalaha maalinta aad heshay daryeelkaaga, beddelka isticmaalka buug yaraha. Buug yarayaasha waxaa la geeyaa agaag kala duwan dhammaan St. Elizabeth Healthcare, ay ku jiranaa St. Elizabeth Cancer Center, siiba St. Elizabeth Physicians xafiisyadooda halka bukaanku ka helo daryeelka. Tani waa fursad gooni ah ee ka bixida St. Elizabeth barnaamiyadeeda aqoonsiga ee bukaanada iyo qoysaska si loo muujiyo mahadnaqooda dhexda fariimaha la gaar yeelay ama hadiyadaha maaliyada.

Deeqdu maaha filashada barnaamijka. Adiga ama qoyskaagu waxaad qori kartaa fariin ku saabsan daryeelka aad heshaan si aad u sharaftaan shaqaale kasta oo jooga xaga St. Elizabeth Healthcare. Marka shaqaale lagu aqoonsado barnaamijkan dhexdiisa, Mu'asasada waxay abaal marin siinaysaa shaqaalaha St. Elizabeth oo ku xidhan biilka lagu dhejiyo calaamadooda ama bilada.

Waxaad sidoo kale u mahad naqi kartaa ama ku sharfi kartaa St. Elizabeth shaqaalaha, ama taageerada shaqada ee St. Elizabeth magaca shaqaalaha, adodo booqanaya www.stelizabeth.com/grateful, ama iskaan saar koodhka QR. St. Elizabeth Foundation waxaa lagala soo xidhiidhi karaa (859) 301-3920 ama iimaylka **stefoundation@stelizabeth.com**.

## DARYEELKA DADKA BILAA CAYMISKA AH/KAALMADA DHAQAALE

Si waafaqsan warbixintayada hawl galka, St. Elizabeth Healthcare waxay bixin doontaa daryeelka, gudaha awoodahayaga maaliyadeed, kuwan jooga Waqooyiga Kentucky iyo Indiana ee u baahan adeegyada caafimaadka laakiin aan awoodin kharashka. Waxaad la xidhiidhi kartaa waaxda Kaalmada Dhaqaale (859) 655-1925 wixii su;aalo ah ee ku saabsan Daryeelka dadka bilaa caymiska ah/Kaalmada Dhaqaale.

## ISKU XIDHKA DARYEELKA

Aqoonsashada iyo qorshaynta baahiyaha daryeelka wareegida suuragalka ah waxa uu bilaabmaa maalinta lagu dhigo cusbitaalka. Kooxdayada Isku duwida Daryeelka waxay halkan u jogtaa inay kaa caawiso baahiyaha qorshaynta ka bixida. Kooxdu waxay ka kooban tahay kalkaalisooyinka iyo shaqaalaha bulshadda kuwaas oo la heli karo maalin kasta laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo. Adeegayaga waxaa ku jira samaynta caafimaadka guriga, daawaynta jidhka oo goobo kala duwan ah, ogsajiinta, iyo/ama qalabka caafimaadka.

Hadafkayagu waa inaan ku siino wakhti habboon, adeegyada qorshaynta la gaar yeelay ee ka bixida cusbitaalka si ay kaaga caawiso inaad ka wareegto cusbitaal ilaa guri ama haddii ay lama huraan tahay xarunta daryeelka caafimaadka oo kale.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah, waxaad la soo xidhiidhi kartaa waaxda Isku duwaha Daryeelka lambarka (859) 301-2275.

## QORSHAYNTA KA BIXIDA CUSBITAALKA

**Su'aalaha laga fekerayo ee ku saabsan marka la qorshaynayo ka bixidaada cusbitaalka.**

Ma qabtaa wax walaacyo ah oo ku saabsan fikrada tegida guriga marka aad ka baxdo cusbitaalka?

Miyaad haysaa wax walaacyo ah oo ku saabsan u diyaar ahaanta inaad qabto hawlahaaga maalinlaha ah xaga guriga sida qubayska, tegida xamaamka, fuulida jaranjarada, ama diyaarinta cuntadda? Haddii ay sidaasi jirto, maxaad caawimo uga baahan tahay?

Ma leedahay qof kugu caawin kara xaga guriga? Waa kuma qof kaas?

Kumaa joogi doona si uu kuu geeyo ballamaha dhakharka ama si uu kuu geeyo farmasiiga si loo buuxiyo dawo qoridaada?

Ma qabtaa walaacyo ku saabsan bixinta dawo qoridaada?

Ma u baahan tahay qalabka caafimaadka xaga guriga sida birta lagu socdo?

Haddii aad ku xidhato ogsajiin xaga guriga, kaas oo keeni kara taangiga la qaadi karo markaas waxaad u diyaar garoobi doontaa bixida?

Kumaa guriga ku gaynaya wakhtiga ka bixida cusbiaalka?

Haddii aad qabto su'aalo kasta iyo/ama walaacyo ku saabsan baahiyahaaga qorshaynta ka bixida cusbitaalka, fadlan waydii inaad la hadasho kooxda Isku duwaha Daryeelka qaybtaada ama waxaad kala xidhiidhi kartaa waaxda Isku duwaha Daryeelka lambarka (859) 301-2275.

## KA BAXAYA ST. ELIZABETH HEALTHCARE

Dhakhtarkaaga ayaa go'aan ka gaadhay marka aad awoodo inaad ka baxdo cusbitaalka. Waxaa lagu fari doona inaad raacdo daryeelka la socodka ah, dawooyinka iyo daawaynta dhakhtarkaaga iyo shaqaalahayaga. Haddii aad ka baxayso maalinta xigta, fadlan bilow inaad u soo diro qayb alaabtaada gaarka ah (sida ubaxyada) guriga saaxiibadaa iyo qoyskaaga oo qaadaya, iyo si kalsooni leh u qorshee wakhtiga lagu qaadayo.

Marka kalkaalisadaadu kuu sheegto adiga wakhtiga aad bixi karto, waa inaad la xidhiidhaa xubnaha qoyska si aad u samayso qaban qaabada gaadiidka guriga, oo xidh-xidho alaabtaada gaarka ah. Fadlan ogsoonow in la taliyaha maaliyada uu dooni karo inuu kula hadlo ka hor bixidaada.

Ka dib marka shaqaalahayagu dhammaystiro tilmaamaha ka bixida, gaadiidka bukaanka ayaa la wici doonaa oo waxaad fili kartaa in qof uu iman doono 30 daqiiqo gudahood si uu kuugu raaco albaabka hore. Waa fikad wanaagsan in uu joogo xubin qoyska ah ama saaxiib inuu kaa sii horeeyo si uu uga soo saaro gaadhida baarkinka markaas waxay kugu sugi doontaa xaga albaabka hore.

Xubinta qoyskaaga ah waa inuu ku jiraa baabuurka. Baabuurka aan lagu jirin gudaha Meesha aan baabuurka La dhigin - Haadka Dabka waxaa dhici karta in tigidh loo jaro/booliska maxaliga ah uu jiido, Haddii aad rumaysan tahay inay jirtay daahida 30 daqiiqo gudaheed wakhtiga sugida qofka ku qaadaya, fadlan haka baqan inaad la xidhiidho kalkaalisada istaanka.

## SHAACINTA MACLUUMAADKA KA SOO BAXAY DIIWAANADA CAAFIMAADKA

Haddii aad ubaahan tahay inaad hesho koobiyada diiwaanadaada caafimaadka ka dib marka lagu fasaxo, waxaad ka codsan kartaa iyaga addoo la xidhiidhaya waaxda Diiwaanada Caafimamadka xaga Edgewood. cosiyada waa in hore loo sameeyaa oo oggolaanshaha qoraan waa in la helaa. Saacdaha waaxdu waa dhammaadka todobaadka. 8 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.

Macluumaadka dheeradka ah, waxaad la xidhiidhi kartaa karaaniga wada xidhiidhka gudaha waaxda Diiwaanada lambarka (859) 301-3876.

Haddii lagugu daweeyo meel ka mid ah goobahayaga, diiwaanadu waxay codsan karaa iyagoo soo wacaya (859) 301-2240.

Haddii aad rabto tilmaamahaaga bixida oo ku qoran qaab koronto ah wakhtiga bixida, fadlan ku wargeli kalkaalisadaada. Doorashada kale waa in la helo diiwaanadaada dhexda kootada MyChart, si kastaba ha ahaatee, tani keliya waa suuragal nooca kombuyuutarka miisaska ee websaydka, lagama soo geli karo abka moobilka MyChart.

## XOG URURINTA BUKAANKA

Ka dib markaad guriga ku noqoto, waxaad heli kartaa xog ururinta telefoonka ee ka socota shirkada cilmi baadhida iyaddoo metelaysa St. Elizabeth Healthcare. Jawaabaha xog ururintan waxay na siisay fursada lagu qiimeeyo tayada daryeelka iyo adeega lagu bixiya St. Elizabeth. Waxaanu rajaynaynaa inaad awoodo inaad wakhti ku qaadato aad kaga jawaabto su'aalaha markaas waxaanu garan doonaa sida aanu u horumarinayno adeegyadayada.

St. Elizabeth
HEALTHCARE